80

WAXAA KU JIRA SIDEETAN GABAY

WAXAANA SOO HABEEYEY

CABDI MIRE CALI

15/10/1983

WAXAA MAANSABAN NAAGTIISII OO UU BOONAYEY
INUU FURO KU SII SAAGOOTIYEY NIN LA ODHANJIREY
CILMI NUUR WUXUUNA YIDHI;

BAHABOY DICIIFBAAN IHIYO,
WAXAY BUURIYADU ILA FAGMEEN,
BAYACNA WAAN QABAA WAXA IDILEY,
DARANBOORI WAXAA LOO LISAA ,
BABAALKAYGU WAA INAN HABEEN,
BABADEEDNA AAN BAAN HELAA,
ADNA DAAHA WAXAB SOO ROGTAA,
HADDII AAN BURBAAN LAGULA TUMIN,
SIDII GEEL INTUU SOO BARMABAY,
OO LAGU BAREERSHOO CALEEN FARAQLE ,
BARAR HADBAANAB IGA MAALIN WAA KUU,
WAAKUU BUDMIYO CIILQAB IYO,
ANA WAXAN BARDHANAYAA HADHGALAY,
BAN BAA II RUNSHEEGTAYE,
MAANDHAY BAYBAYO WIIL YAROON,
ANIGANA BALAAQBA IGA HOO,

BUQ IYO WAAYEELE.
BA'IYO WEYNAANE.
WAA BARYEEL LI'IYE.
BOOBKA GAAMURAYE.
KUGU BUL CIIRAAYE.
LAY BILAA WANANE.
BUHURKA MAALMEEDE.
BIIBEY NABADDIIYE.
BOOGNA LAGU FOOFSHEY.
SOO BAAQAY.
BAGAAL ABIYE.
BIRIR ABIIBKAAYE.
BAACAB WAA GABOWE.
ANAA KAA BABAAL JECELE.
BAALIN BAAB HELIYE.
WAA BACGABAY AANE.

WAA BHANYAHAY.

GABAYGAN WAXAA KU GABYEY NIN LA ODHANJIREY
CALI MAXAMED CALI OO KU DHASHAY GOBOLKA
BOOSAASO WUXUUNA YIDHI.

DHAFKA TIMAHA DHAASHIGA WEJIGA,
DHEXDA MADAGA DHOOLAHA YARYARA,
DHEG KA MAQALKA DHAAYAHA INDHAHA,
DHALAALKAAGA QIIMAHA LAFAHA,
DHAQAAQAAGA SOCODKAA LUGAA,
DHIIDHIIBSIGAAGIYO DERNAHA,
DHARKA QAADASHADA NAAG XUN BAY,
DHALAD UMA GUDBOONIDIN HABLAHA ,
DHOOBOO KALEETAY NOQDEEN,
ALLAAN ADIGA KAA DHIGIN KUWAA,
JAAJADA DHAMAAN IYO DHINAAN,
DHALASHADEENA INAD FIIRISAY,
DHEGTA WAX IGA MAQASHII SIBAAN,

DHERERKA JOOGAAGA.
DHODO WANAAGAAGA.
DHUGASHADAA NAASKA.
DHUUXA KA AROORAY.
DHAWRASHADA RUUXA.
HADALKA DHUUDHUUBAN.
DHUDO WAREEGTAAYE.
DHULAKAN JOOGAAYE.
DHOOF WIXII TEGAYE.
GAALADOW DHAXAYE.
DHIRINDHIRAYNTEEDA.
IILA DHAWDAHAYE.
KUUGU DHOLOLAAYE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY RAAGE UGAAS
OO FARASKIISA KU AMMAANAYEY WUXUUNA YIDHI.

GEERAAR WAA NIN WANAAJIYO,
NIN WARAAR KAGA OODMIYO,
NIN SIDAYDA WARKIISIYO,
WACDIGIISA YAQAANA.
WALHADOW FARASKAYGA
WEEDH YARAAN KU AMMAANAY
WOWGA MAAN KA BILAABO.

GAMAAN WAA KALA WAAREY,
WEEHADOW OROBKIISU,
WADHAF DEYN LAGA TUURIYO,
TAARKA LAYSKU WARAYSTIYO,
MA WAYEENKA SHUKAANTA OO,
WIIL YAQAANI ROGAAYO'OO
WANAAG LOO QABTAYBAA.

WEYRAXOW CAMALKIISUNA,
WARAABKAAN U KEXEEYO,
ANIGOO WADA MOOYIYE,
ISAGAAN WADA LAACIN,
NINKA HAANTA KA WAABSHIYO,
WALLAYSKAA GARAB JOOGABA,
WIDHIIDHU KU DILAAYE,
WIYIL QOODHA MIYAA.

WEEDHAANSHOW DHAKHSIHIISUNA,
MA WAREEGE LIBAAXOO,
INTUU NEEF KA WAB SIIYEY,
WID HADDII LA YIDHAAHDO,
WANKALAALI UBOODKA,
DADKA WAABINAYAA.

WEERARKAANU GELEYNO,
WIRIIRKAAN UGA GOOYEY,
SINTA WIIFTA KA YEEDHI,
CANBUUL WAADHI KU TAALIYO,
MA WAJAAF LA RIDAA.

WELI WAA SOCDAA.

WAA ISLA ISAGII

WERISOW MIDABKIISUNA,
CIRKA OO WADHANAAYA'OO,
WAHABKII LAGA QAADIYO,
WIRIILAA AN CADDAAN IYO,
MA WAAGOO SAGLIYAA.

WEJIGIISA ARSAAQDUNA,
WAX HADDAAN KU ERYAAYO,
MA WADDOOYINKA CEELKA OO,
ROOBKU AAD U WARMEEYIYO,
WAADIGOO ROGMADAA.

MEEL WAYLAAQTAN COL JOOGO,OO
WARMAA LAYSKU RIDAAYONA,
WADNAHAAN KU KABAAYE,
WIIL UU EEBBE ISIIYIYO,
MA WALAALKAY RUMAA.

HADDAAN HEEGA KU WEERAN,
KA WAREEJI IDHAANA,
WAJAQUU ANBADAAYE,
MADAXUU KOR U WAALIYO,
INDHUHUU KA WIG SIIYIYO,
WIYICWAAYAC CURAAF IYO,
MA WAX SHEEG SIXIR BAA.

WARAN WAAXYAHA GOOYIYO,
WAYAD QAARKA MADOW IYO,
RIDDO SOO WIDH-WIDHAYSIYO,
WAJAAFKEEDA RASAASTUU,
IWEYDAARINAYAAYE,
MA WADAAD XIGTADEY YAHOO,
WANAAGII ARDUCUUNKA,
WELIGIISA YIQIINEYOO,
WON INTAAN UQALAY,
WAL DUXAAGA QURRAANKIYO,
WEYLUN II AKHRIYAA.

(WAALLI KUU GOGOSHEYOO,
(WAREEGEYSA DUSHAADA'OO,
(WACDIGAAD KU LAHAYD IYO,
(WAANADII AQDASHAA.

DABKA OO WADA SEEXDAY,
HADDAAN OODDA KA WEECSHO,
WADDANKAAN KU SHAKAALO,
MA WEYDAARAN YAQAANE,
MA WANAAGSAN GADDHEEDOO,
WELI KUU MEHERSHEYOO,

XXXXXXXXXXXX

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY

CISMAAN YUUSUF WUXUUNA YIDHI;

NIN SHUGRIGA ILLAAH IYO, SHAHAADADA QIRRAAN AHAY.

NIN SHURUUDDA TAWXIID, KU SHISHAYSO BAAN AHAY.

NIN SHAFEECADII NEBI, SHINSANAAYA BAAN AHAY

NIN SHARIBAY TAFSIILOO, SHARIXIIS OGBAAN AHAY.

NIN SHUURIYO ANCAAM IYO, SHOCORADA DHIGTAAN AHAY.

NIN SHABAAB AHAANTII, SHAREECADA BARTAAN AHAY.

NIMAAN SHUUSH ILLAAH GELIN , KANA SHAAFIYAAN AHAY.

SHUHUBADIYO CEEBTABA, NIN KA SHEEXAYAAN AHAY.

NIN SHIDDIYO KHILAAF IYO, SHARBA DIIDAN BAAN AHAY.

NIMAAN SHARAFKA SOOMAALI, SHAYNA DHAAFSAN BAAN AHAY.

NIMAAN KALA SHIRSHIRIDEED, KA SHAQAYNIN BAAN AHAY.

NIMAAN SHAWR AJNEBI IYO, SHILLIN JIIDAN BAAN AHAY.

NIN RA'YIGU MARKUU SHEELMO, SHISHUU FIIRIYAAN AHAY.

NIN SHAHMAADKA TAARIIKH, KA SHEEKAYNAYAAN AHAY.

NIN SHOOFAARTA GABAYGANA, SHAACIRKIISAYAAN AHAY.

SIYAABAHAA AN SOO SHEEGAY, NIN SHEEKHOODIYAAN AHAY.

WAA DHAN YAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY XAAJI CABDI AW YUUSUF XAAJI

ISMAACIIL WUXUUNA YIDHI;

INAAD GAARI TAHAY XAABSANEY, GARANAY SHAALEEYE.

GOBANIMADU INAY KAA SAL TAHAY, LAYSU WADA GEEYE.

HAYEESHEE GUHAAD IYO AFXUMO , KUGU GARMAAHAYNE.

AQALKAAD GANGAANTEE KEBDAHA, GUUDKA LAGA SAARAY.

GURGURKAYØ IYO LOOLKIYO, LA'MA'DA LAYSU WADA GEEYEY.

GURTA BIDIXDA GAAWAHA LA SUDHAY, GALAXA CEEGAAGA.

GOOGO'ANTA IYO XEEDHYAHAAD, IGU GUNAYNAYSO.

GARDAADKA IYO LAABTAAD SIDII, GORAY ISAARAYSO.

GELBISKA IYO HAASAAWAHAAD, GOOR ALLABA KEENTO.

GALAB ULAMA JEEDIDE, NAFTAY GEERIDEED TAHAYE.

GOORGOORISKII WUXU AHAA, GABAN AHAANTIIYE.

GOOCAACISKII BAA IDILEY, GURAHA JIILAALAE.

MUGASE GUUBCABDAAYOOBEYOO, GAABIS BAAN AHAYE.

GODOLKII DHAMAAYOO WAX HADHAY, GOROR AN FIICNAYNE.

NA GOOF MAAXDA MIIHIYE IDHAWR, GURAN JIDHKAYGIIYE.

WIXII GOBAN GANUUNAHA BURCAA, UGU GUN DHEERAAYE.

MUSLIMKA IYO GAALADU WAXAY, GACAN TOGLEEYAANBA.

GORFAA IYO WABAAMUHU WAXAY, GALA BEXEEYAANBA.

IYABUBA WAXAY GURA FOGEYD, GAASHE SHACABKIIYE.

NA GOOF MAAXDA MIIHIYE IDHAWR, GURAN JIDHKAYGIIYE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY RIIRAASH
OO AANAN MAGICIISII SAXDA AHAA HAYN IYO INAANYIHIISII TOONA,
WUXUUNA YIDHI.

SABCA IYO CASHARA TOBAN SANAAN, SAADIYAA GABAYE.
SAWDKII WAXAAN UGA HAKADAY, SAABIR NABADEEDE.
MAANTANA HALBOW SABAB NOQDAYE, KUMA SANAADHEENE.
SIDII RAAGE SADHIHII UDILEY, GABAY SABOOLOWYE.
RABIGAY CADAADKII HA SUDHO, SAAQULAHA JAANE.
SUNGUX NIBIRI SOOYAAN JAXAAS, SUURTO IYO GAALI.
WIYIL SAMAL LEH FAANAHAKAN SIDA, QALANJO SAAWEERA.
AAR SAMAC LEH SABALUUX DHURWAA, HALAQA SUUDHAAYA.
KADAF SUUDHA SOONDHO IYO XOOR, SOONGUR IYO GAARRI.
SURXAANYADIYO GARA'DA'DIYO, MULACA SUUBAANA.
SIBRO GORAYO SUUBAAN AYAXA , SAACA LAGA YAACO.
SODONKAY UGAADHUBA AHAYD, SIIQA IYO CAWSHA.
SOOMAALI IYO CARAB MARKAAD UUNKA , KALA SOOCDO.
SAFAL MALAGA KABARJAAN JINIYA, SILICLOW SHAYDAANA.
AMA SUULAL GOYSTAHA WIXII, WIXII SOCOD DHAQAAQAAYA.
SANCA BADANE EEBBOW ADAA, SAATIR BAAQIYA'E
SABKALAXA DHULKAAD NOO DHIGTAYEE, LAGU SABAYNAAYO
SINBIRIIXADA LAGU JABAAN SOCOD , HAGAAGEYNE.
SOO QABO MARKAAN LEENAHAAN, SOCODKA LAAFYOONO.
EEBBOW BXEXX SALLAAMADA ADAA, NOOGA SOCODSIINE.
ANNAGU WAA SINBIIDH BADANAHAYOO, KALA SARAYNAAYE.
SODA DUMISO EEBBOW ADAAN , SABAB KA YAABAYNE.
ADDUUNKANI SIRQOWYOO LAWAA, SAABKI NABADEEDE.
WUXUU SII SABAANSABAHAYAA, SAADDI IYO GAALE.
INAAN SAANCADKIISABA KA TAGO, WAA SIDAAN WABO'E.
RABBIYOW DIINKA II SAHAL NIYAAN, TOOBAD SAAHIDAYE.

WAA DHANYAHAY.

WAA ISLA ISAGII

BIIN QOOL CUNAABIYA QABOO, CIDHIF KA LAALAADSHEY.
OO NIMAN KA CAAL DHEBAHAYAAN, KANA CADHOON WAAYEY.
OO MADAXA LAMA SOO CESHO'E LUQUNTA CEEGAAJEY.
CAYNKAANA ANIGAA ARKAYE, CARA AYAA SHEEGA.
CIR BAKAYLE NEEF LOO COLOBIN, LAGA CABSOONAAYO.
AY CAAN KA TAHAY SOORYADAA, CEEB IN LAGA QAADI.
CAYNKAANA ANIGAA ARKAYE, CARA AYAA SHEEGA.
DAWAC MEEL CIDHIIDHIYA RASAAS , CAYDHKA KAGA YEELAY.
OO GEEL CANTOOBSIYA HELAAN, CIDI WAX MOODEYNIN.
CAYNKAANA ANIGAA ARKAYE, CARA AYAA SHEEGA.
MULAC MAARRE CULUS JIIDAYOO, SHIR U CARRAABAAYA.
OO LAGA CABSOODOO HADDANA CUDUB, KU FAANAAYA.
CAYNKAANA ANIGAA ARKAYE, CARA AYAA SHEEGA.
CADAABKII DABKII LAGU RIDOO, LA CAFIYOO TAAGAN.
OO LAYDHA LAGU CAAQIBAYN, CELINA LOO HAYSTO.
CAYNKAANA ANIGAA ARKAYE, CARA AYAA SHEEGA.
ABEES CAARAB BAALA AH SIDOO, CUDUB ADDOOMOOBEY.
OO DHAY CARFOON IYO AMLEY, LA CIDI JIIDAAYA.
CAYNKAANA ANIGAA ARKAYE , CARA AYAA SHEEGA.
CODKAAN IDHI ISMAACIIL MIROW, CALI HALOO GEEYO.
AFARTAA CADCEEDOOD MARSHIYO , TAN IYO CAWBAARE.
CISHIRIIN BAB BAAN SIIN NINKII, CAYNADDAA FURA'E.
HADDII KALE ISOO WADA CAFIYA, CAALIM BAAN AHAYE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CALI MAXAMED AADAN

OO KULA HADLAYEY WIIL UU DHALAY WUXUUNA

YIDHI;

HASHII AAN MAGLIGA RAG ULA DHACAY, MURUQYADII GOOYEY.

HASHII AAN MAKALAY KII LAHAA , ANIGA OO MAAGAY.

HASHII AAN MAQAAWIIR TOLKAYA, UGA MAQNAAN WAAYEY.

MAADHIIN QARXAAYIYO HASHAAN, CUDUD KUSOO MEERSHEY.

HASHII AAN MATAANAHA USIDEY, MAALINTIYO LEYLKA.

MUSLIM GOORU JIIFABA HASHAAN, DABA MALUUGNAADEY.

MIRTA IYO HABEENKII HASHAAN, MAYRACOW BADIYEY.

INAAD MIDAB HALDHAALEY NIN KALE , IGA MIHIIBSIISO.

AY IGU AG MAALAAN MARNABA, MIINKA KUMA TAALLE.

MAWD NIMANU UGA QAADAY ODAY, SOO MULKIYEY DHEEHO.

AAN MEEL CIDHIIDHYOON U GELIN, HAW MASAYRINA'E.

ADIGAA MASQARO MOODAYIYO, MAAHIR SHAY FUDUDE.

MUSKUUN BAAD KU ARAGTEE MA OGID, HAWSHA LOO MARAYE.

MA HANTIYO ABIIDKII NINKAAN, MEYD U JIIDHINIYE.

MUSUQMAASUQ BAA LAGU HELAA, TII HABLAA MUDANE.

ANBA MEHERKA KII HOOYADAA, MAAL KAMAAN BIXINE.

MAANDHOW IMAQAL TALABA WAA , LOO MIYIRIYAAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY YUUSUF SHAR-MA ARKE OO
UGU GABYEY XASAN TARABI WUXUUNA/ YIDHI;

GEELAAGA DAYR DHALAY INTAAD,
DERIS TOLA AYAAN KUGU WADIYO,
DOQONADAN OGAADEEN HADDAAD,
DURBA DIID DAREEN BAANA GALAY,
QURUUMIINA WAA DAAFECEEN DIL IYO,
KOLKA LABADA DAAN BUU KU HADHAY,
DACAWAB KULUL XAFIISKIYO HADDII ,
KA DIBIRE IIDOOROW HALKIYO,
HABARYOONIS BOOLIYO WAR DHEER,
DEYR IYO DIGRIGA LAAMO IYO ,
MEESHII DALLAADIYO LAHAYD ,
DULIHII BANAANAA HALKAAD ADIGU,
DAMEERAHA JIDWAAQ IYO LO'DAY,
SHAN DERBIYO DAROOR IYO QARBOON,
DEMANAANSHAHAYGAAD WAX BADAN,
SIDA BAHALKA DAWRA AH INTAAD,
NIMANBAA DALKIINII QABSADAY,
SIDII AWR LIBAAX DUUR UGALAY,
SACAD MUUSE GOORTUU KU DAYO,
WAATAA RIYUHU BAAQAYAAN,
DUKAAMADI HARGEYSIYO HADDII,
DANI SEETO WEEYEE HADDAAD,
IDINKIYO DABAYSHIYO AYAXA ,
DIJIR WAXA KU NOOL DEERADIYO,
QOTON BUU ARLAA-IGA KA HELAY,
KA DALAASHO DUUD WEYNE CEEL,

DAR U SAMAYNEYSEY.
SEEDI NOO DEGAYE.
DABIN U QOOLEYSO.
WAANA LOO DIGAYE.
MAAL QAADE.
MAGAC DAGAALKIIYE.
JANANKI LOO DOONAY.
DABADI CEEL BUURE.
LOOGA DACAREEYE.
DIXIBA YOOCAALE.
BUURKA IYO HIISHA.
DOONEYSEY.
DAAQSINTOOD TAHAYE.
DEEQA WAAN DHIGIYE.
GOLO KU DAAQDEENE.
DEBADDA MEERAYSO.
DOOXYADII HERERE.
LAGU DINAAHYEEYE.
YAAD KASOO DIDIYE.
DEGELADIINIIYE.
DAARTI LAGU DHAAFSHEY.
KOOBNA DARI WEYDEY.
YAA DULMEER NOQONE.
CAWSHA DIBADEEDE.
IDILKI DAA-UUDE.
DAWDAR BAAD TAHAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY

MAXAMED XAREED WUXUUNA YIDHI;

SANAD WALIBA QAARUUU KHALQIGA, SAYMO GELIYAAYE.

QAARUUU SAREEDO U WADAA , LOO SAKHIRAYAAYE.

WAA SAHA ADUUNYADA LAWAA, INAY SINAATAAYE.

SAAKIYO AR BERAA REER ADDUUN, KALA SAREEYAAYE.

HADBA SIDU ILLAAH KUU GARTAA, LAGU SAMADAAYE.

SARANSEERKA WAA QABI JIROO, CAYDHI WAA SIDA'E.

ADBA SOOFKA BADAN WAAD LAHAYD , SAMATAR NUUROWE.

WAXNA IGAMA SIINEYN MARKAAN , KU AG SALOOGNAAYE.

SOOLQORIJAB MAANTAAN ILMAHA, KUULA IMI SOOGAN.

SACABADA MARKAAN KUU DHIGTEE, DANI ISEETAYSAY.

WAATAAB SAKADA QAADO TIDHI, SAAMIGEED QUDHAHE.

ANBASE MAAN SALUUGEYN KAL HORE, SADAQADAADIIYE.

SARANSEERKA WAA QABI JIROO, CAYDHI WAA SIDA'E.

SAMIR QAADO WAAKAAB NABSIGU , SAADISOO YIMIYE.

WAA DHANYAHAY

WAXAA MAANSADAN TIRIYEY NIN LA ODHANJIREY

XARIIR AADAN WUXUUNA YIDHI;

DHAMIGIIBA JIDHKAYGA

ALLIHII DHOOBO KA UUMAYEE,

DHISAYEE ISKU JOOJAYEE,

ISU DHEELI U DIIDAYOW,

DHIBTA AAN QABO CAAWA,

DHAKHSO IIGA KOR QAAD.

CAGTA AAN DHULKA SAARIYO,

LUGAHAAN KU DHAQAAQIYO,

GAMCOHOO DHAB WAX SIIYIYO,

DHAAYAHAA WAX ARKAAYIYO,

DHAWAAQAAN KU HADLAAYIYO,

DHEGOHOO QABANAAYIYO,

DHABADA NEEFTU MARAYSO'EE,

HADBA AY DHAN UQAADIYO

DHUUBANOW CARABKAYGA,

BHUUNIGAA AN CUNAAYO

DHANDHANAANKA KARUURKIYO

DHAYDA XOORKA MACAANLE

DHADHANKOODA U QAYBSAN

DHITADAYDIYO KAYDKA

CALOOSHAAN DHIGANAAYIYO

DHINACAA AN U JIIFIYO

DHAMIGIIBA JIDHKAYGA

ALLII DHOOBO KA UUMAYOW

DHISAYEE ISKU JOOJAYEE

ISU DHEELI U DIIDAYEE

INTII UU NAF KU DHEEHAY

DHAQAAJEE SOCODSIIYAYOW

DHIBTA AAN QABO CAAWA

DHAKHSO IIGA KORQAAD.

ALLIHII DHULKA JIIFSHAYEE,

INTUU BUURO KU DHAABAY

WEBIYAAL KA DHEX JEEXAYOW

DHIBTA AAN QABO CAAWA

DHAKHSO IIGA KOR QAAD.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY BURAALE CALI SEEXDE
MAR LAGA SHAKIYEY ISAGOO BARAAWIISHTII KA MIDA WUXUUNA YIDHI;

AWGAY HADDAAN TAGO RAGWAA, KALA TOLOOBAAYE.
TARTIIB IYO WANAAG IYO WAX DHIIB, TOOBAD IYO XAAJO.
TOBAN XAALO AAN YEELI JIREY, SOW LA TEBIMAAYO.
TUB SHISHEEYE NIMAN KAAGA YIMI, TUBANNA GAADHKAAGA.
BAKHAYLKII HADDII U KA TAGO, BGOOBTA KUU MADHIYEY
TARTIIBTIYO WAX DHIIBKAAN LAHAA, sow la tebimaaye
TOBAN REEROHOO TAMARLE IYO, TAAWO IYO CAANO,
WAXAAN GAADHKA SOO TUBAY ABAAR, UUNKU KALA TIICAY.
MURTIDUU TOLKAY QAABAN JIREY, SOW LA TEBI MAAYO.
HADDAAN DHOOBO WEYN TACABNO OO, TUBO BANAANKEEDA
BAKAARAHA HADDAAN TUUNSHO OO, TU'INO UURKOODA
HADHUUDHKAAN TASHIISHADA LAHAYN, SAW LA TEBI MAAYO.
TOLAALAYDA QAYLADU HADDAY , TALAX KA SOO YEEDHO,
TUBTA MAALINTII LAGU DHECEE, TOROG LA HEENSEEYO.
RAACDADA HALKAAN TEGI OGAA, SOW LA TEBIMAAYO.
TOLKAY IYO TOL KALE MAALINTII, LA ISU SOO TUURTO.
BAQIHII HADDII NALALA TAGO, TU ALLA WEYAANE.
ROGAALAHA HALKAAN TOOSIN JIREY, SOW LA TEBIMAAYO.
DHALIIN YARADU TOORAHA HADDAY, TUBAHA QAABAYSO.
AY KORODHO DAWR KAA TAGTOO, TEMESHLE LOO JOOGO.
TILMAANTIYO HABSAMIDAAN LAHAA, SOW LA TEBIMAAYO.
TOGGA WEBIGA TUURAHA FADHIYA, ADARI TAAGEEDA.
INTAASOO LA WADA TUURANYAHAY, YAAN TUMAATIYAYE,
OGAADEEN SIDUU II TIX GELIN , SOW LA TEBIMAAYO.
DADKU HAATAN WAY WADA TEMEDIN, TIMAHA DAAROODE
TEENANA TUDHAAL KUMA QABOO, WAAKA TEGAYAAYE.
HADDAAN WEBIGA TUURAHA KU MARO, SOW LA TEBIMAAYO.
DADKU MAALINTUU KALA TAGOO, TUBIBA MEEL AADDO
OO TALIYE SOO WADA CESHIYO, TOOBAD LAGA WAAYO.
KOBTAAN TIIRKA UGU DHAABI JIREY, SOW LA TEBIMAAYO.
TOLKA HABAR SALEEBAANA IYO, TUBAHA REER YUUSUF
MAREEXAANKA WADA TAAGAN AAN , TU'BA KA SHEEKAYNIN
JIBRAA-IIL HADDII AAN LA TAGO, SOW LA TEBIMAAYO.
TABAHAAS ANOO QABA HADDII, LAY TIX GELIN WAAYO.
TUHUNKIYO HADDAAN LAYGA BEYN, TOOGASHIYO CEEBTA
WALLEE ANIGU WAAN TEGI HADDII, TUURIN LAY GELIYO.

WAXAA MAANSADAN TIRIYEY SAMATAR BAXNAAN

WUXUUNA YIDHI

OOFAHA MARKII LAY JAREE,
MAANTAAN ITAAL IGU BADNAYN,
RAGGU OBAYGA WAA WADA SINAA,
ARROW ADIYO INA REYGAL BAA,
WAATAAD ILAALO U DIRTEEN,
WAATAAD ALBAABADA JARTEEN,
WAATAAD AFKUU GALA GASHEEN,
ALLAAN DILINE WAATAAD WEJIGA,
ASARAARI MAAYOO NINKII IGA ,
AAR DIBADDA MEERUU AHAA,
ISAAQ IYO OGAADEENBA WAA IGAGA,
HADDAAN ANIGU AAFAHA KU LUMO,
ISAGANA ABAALKIISU WAA INAN ,

ADHAXDA LAY GOOYEY
ALALAD MOOYAANE.
AANO IYO JIIDHE.
II UGAADH TEGAYE.
INANKI FIICNAAYE.
AQALKI WEYNAAYE.
OLOLE MAADHIINE
KAGA ABBAARTEENE.
ILROONAAYE.
OOGADAA SARE'E.
OODNAAYE
IMA ILAAWEENE.
U AARAAYE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN YAR WAXAA TIRIYEY XASAN CABDI CIYE

WUXUUNA YIDHI;

CASIISOW ALLAHAYOW TOLIMO, CAABUD BAAN AHAYE.
ANIGU CEEB SOKEEYIYO MA RABO, CAMALKI DAAROODE.
NINA CAANO KUMA MAALI KARO, COL IYO DUULAANE.
CAAMADA HAYAAG IYO GUNBAAN, U CINDIYOONAYNE.
WAADIGA CIDEEDII ARKAYOO, CUUN KASOO BAXAYE.
CINDIGAA WAX LAGA FIIRIYAA, WOW CALAACALIYE.
EYGABA NINKII LAA CESHADA , CEEB HADDUU FALO'E.
CABSI REERKA OO LAGU FURAAD, COL UGA YAABAYSO
ISAGAA CIDIISA ASTUROO, CEEJIYOO DILA'E
HADDUU MADHAXA REERAHA KA CUNO, LOOMA CAAL HELO'E.
NINAAN HAW CALAACALIN HAYAAG , CAARIDAAN HELAYE.

WAA DHANYAHAY

GABAYGAN WAXAA TIRIYEY XASAN CABDI CIYE

WUXUUNA YIDHI;

TOLA'AYEEY GABDHAHA CIILLI,
HADBA WAXAN LA CADANYOONAYAA,
SIDAY BIIXI CEEL UGU RIDDAAN,
CEEBLI'I SIRAAD UMA GO'DEEN,
MARKII GABADHA CAALUHU ARKAY,
COL LA WAAYEY RAACOW GUNBAY, CXXX
CANBAAREEYE DUMARKII FADHIYEY,
CIDDAYADIYO MAXAMUUDADAY ,
GOORTII GUN LAGU CAAWIYAAN,
MARKAN CALAF HA JOOGTEE KA TEGEY,

WAA REER XIRSI CIGAALE.
CANAB LA MOODIIYE.
LA CAJEBAAYAAYE.
TURUQA CIIDEEDE.
CIIL LA KAW TIDHIYE.
CAABADEED TAHAYE.
CEERIYADA HAWDE.
KU CINDANAAYEENE.
CAASHAQOOD DHIGAYE.
CODASHADOODIIYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA NIN LA ODHANJIREY XARBI ISMAACIIL
OO KU MAGAC DHEERAA XARBI DHEERE WUXUUNA YIDHI;

GEERAAR WAA TOBAN AYNIYOO
WAA ALAALO GOBEEDOO
WAA ALLAALIYO GOODIYOO
WAA AMMAAN IYO CAYOO
WAA ABOOTIYO FIIRO'E
NIN YAQAANA SIDAYDIYO
NIN AWOWGI KA RAACIYO
NIN ARDAAYADA GEELA
AFAREY XUN KA SHEEGAYOO
RABBI OODO KA SAARAY
KUMA AAKHIRO WAAYO
ANSE AABIYO WAALID
ISIR BAAN KA WATAAYOO
AWOWGEY FIQI GEEDIYO
ODAYAAL KA HOREEYIYO
ABBAY NOOGU SINAYDOO
ARBOW RAAGE UGAAS IYO
IN INTUU MARINAAYIYO
HADDUU MAAX KA UMAADAY
UUNKA KIISA KALEETAAN
KA AANAYSANAYNAA.

WAX WANAAGSAN ALLAA LE
IFKA LAYSKUMA WAARSHO
NAFINA MAWD KAMA OOSHO
IIN SOKEEYE MA FIICNA
AQLI GAAB KAMA REEYO
KUMAAN II OGOLAYNOO
UMAL YUU KU JIRAAYOO
YAA KA EEMADA SHEEGANOO
ANAF QAADASHO DIIDANOO
HABALKII MA OGEYN IYO
EEGA NOOGU CESHAY IYO
WAA AFEEFANAYNAAYE
HADHOW YAA LA IMAAN.

WAA ISLA ISAGII

ABYEY OO ISKA DHAAFAYOO
URURSHOO KA DHAQAAQAYE
IN KALEETANA WAA
ILLAAHII AJASHAYDA
ALLII AWJADKA LOOXA
ILLAAHII ABTIRSIINTA
ALLII AYDINTA GEELA
ALLII AALAHA BEERTA
ALLII UUDKA HADHUUDHKA
ALLII UURADA ROOBKA
ALLII MAALIN AROORA
ALLII OOBO LA GOOYEY
ALLII AW IYO SHEEKH
ALLII OOGTA SALAADDA
ILLAAHII AJASHAYDA
MAALINTII NALA UUMAYOO
UUNKA LOO KALA EEXDAYEE
QAAR AMXAARO NOQDEENEE
UMADDII NEBEGII IYO
ANBIYAASHA QURAANKIYO
ASAXAABTI RASUULKIYO
DUUDKA REER NEBI AADAN
NAGA YEELAY ISLAAMKA'OW
ILLAAHII ABTIRSIINA
REER DAAROODKA ISMAACIIL
OGAADEEN MADAXDIISIYO
ARRIN QAADKA SUBEYR IYO
ISAXAAQ IRDIHIISIYO
GAANKA REER AXMEDKAA IYO
WAXAY SII ANBA QAADDABA
REER GUULEED AMAR WEYNIYO
DALAL IIGU EKEEYEYEE
UMMADYOWGA WAJAALE
ARWAAXAYGA KA YEELAYOW.
ALLII AYDINTA GEELA
IDISHEEDA IRMAAN IYO
GOOL WEYNOO INTIHOOBIYO
AFAR NAAS IYO XOOG IYO
IB AAN CAANO KA MAALIYO
INTIFAACA U YEELAYOW.
ALLIHII UGUBKEEDA
UNUUN GOOYO MAQAAR LEHOO

WELI WAA SOCDAA

WAA ISLA ISAGII

WELIGOOD ILMO DHAADHYINOO
OGOLAANSHAHA SIIYEYOO
QAARBA AYNI KA YEELAYOW.
AWRKA WEYNE KARMOONI
RAR HADDUU KU IRDHOOBO
ITAALKIISIYO XOOGGA
WAA MAROODI UFOODAYOO
LAMA SOO AG MAREENE
ALLII NOO EDBIYEYOO
ASAAXAABAL CAYNAAN IYO
NOOGA YEELAY ADDOONOW.
KOL HADDUU OROD MAAGANA
NIN ERYAA MA QABTEENE
ALLII AARKA LIBAAX IYO
NOOGA REEBAY X UGAADHA'OW
ILLAAHII UDBO XOOGLE
DHULKA NOOGU ADKEEYEYEE
ADNO XOOLO CUNAAN IYO
UGBAAD NOOGA BAXSHEE
ARLO BEEXA NA SIIYEYOW.
AMIN KHOOFKA HABEENKA
HADDII LAYSKU ILOOBO
WAA LA IILAN LAHAAYE
ALLII OOGTA SALAADDANA
DHULKA NOOGU IFTIINSHEYOW.
ALLII AWYADA SHEEKHDA
WAXA AAKHIRO JOOGA
NOO OGAAL WARAMAAYA
INDHAHAYGA HOR JOOJEYOW
ILLAAHOW MAHADDAA.
ABYEY OO ISKA DHAAFAYE
URURSHOO KA BHAQAAQAYE
IN KALEETANA WAA
HADDII AARKIYO GOOSHA
UBADKOODA LA LAAYO
AMBABAY FADHIYAAN
AAMIN LOOGUMA LAABMO

(ILKO WEYNE MAROODI
(ILMO LOOMA XANBAARO
(IRGIN GEEL KUMA NAAXO
(UL WAALEY LAMA DIIRTO
(RAG NIN KAA AQLI ROON
(OQOON LOOGUMA FAANO
(ILLAAHOW AMARKAAGIYO
(UMUURTAA BADANAA.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY XARBI ISMAACIIL

WUXUUNA YIDHI;

SIDII GEEL INTUU OOMANAA,
OHAYO LOO QAADEY

OO GOOR AROOR HORE AHAYD,
OODDA LAGA JIIDEY

OO MEEL BIYALE AAWILOO,
OLOL QAMAAMAAYA

AMA AWR INTUU QOOQANAA,
EEGI LAGA REEBAY

AMA WIIL ISKAA YEELA,
OO RAG U ITAAL SHEEGTAY

AMA AAQIL GEEDKUU FADHIYEY ,
LOOGU IMAN WAAYEY

AWLEEYEYEEY XALAY MIYEY,
OLOSHEY LAABTAYDU.

AF WAXAAN KA IDHI XAAJADAA,
LAY AQBALI DOONO

ILLAAH IYO ASMADA DIINKA IYO,
AAYADII NEBIGA

ALBOQRIYO IDAA JAAGA IYO,
ALIFKA HOOSEEYA

SHEEKHYADA CILMIGA NOO AKHRIYA,
CULIMO AWGEEDA

AWLIYO DHAMAANTEED KURTEED,
URURKA JEYLAANI

ASAXAABIHII IYO INTII,
EHEL KARAAMEEDA

UDGOONOW RASUULKIYO KABCADA,
LAGU AROORAAYO

IDANLIINKA WEYNOW WAXAAN,
KUGULA SOO OOYEY

AFKA ISHABA KAA BARYEYOO,
WAAD NA ARAGTAAYE

IINSHAARTA WAA LOO FURAA,
RUUX KU AAMMINAYE

AAKHIRIYO MAWDKIINA WAA
LAGAMA OOLAANE

NAFTU WAA AMMAANO'E HADDII,
EREGTA LAY DHAAFSHO

ALLAHAYOW ALBAABADA JANADA,
NAGU IJAABEYSO

AFAR KALENA WAA DUNIDA IYO,
MIDAN KA EEG EEGAY.

ILLAAHAY ARSAAQDIISU WAA,
LAGAMA OOLAANE

ARLIGAY KU WADA SAYDHANTAHAY,
IDIL AHAANTIISE

KOL HADDAANAB IIMAAN LA'AYN ,
WAA IRMAANTAHAYE

AFKA BUUXI IYO LAGUMA HELO,
ERIYO ROOROORE

UURKAABA LAGU QUUDIYAA,
UBADKA OO YAALE.

ASHAHAADADAA IILA ROON ,
AYNI LOO HELO'E

ALLAHAYOW WIXII LAGU IRKADO,
OOFI SAMAHAYGA

AFAR KALENA WAA ERAY YARAAN,
NIMAN OGEYSIINE

WAATEY AFMEERKIYO FADHIDEY,
OODA JIDHIDHEEDE

WAATAAD HALKIYO AAMANUUN ,
AGA MAREYSEENE.

LO'DII NAGA AROORTIYO,
COLKII UUNKU WADA RAACSHEY

KUMA AAN OGOLI WAA HORAAD,
NAGA ABKAYDEENE.

ALLOW MAA ANAGA MAALINTAA,
NALA OGEYSIIYO

AFAR KALENA WAA HADAL YARAAN,
IINANYO U REEBAY

UBAD UBAD UDHACA WAA WAXAAD,
HORE U EEDDEENE

WAAGAAD AMAAH NAGA HESHAAD,
ALAQADAYSAANE

SIDII INAN DURBAAN LOOGU TEGEY,
HAYS ALMAAMINA'E

WAA EEGA EEGEEDA KALE,
IDAM ILLAAHAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CALI MAXAMED FAARAX

WUXUUNA YIDHI

ANIGOO CARUURIYO ANOO,
CAWEEREY MA JIRIN MAAL KALAAN,
CIBNA KUMA AAMININ INTAAN,
CUUNKIYO BARMAHA BHOODIYEED,
CALEEN LAACDAY MEEL CAWSLEHOO,
COSOB MEEL LE DHAAXAAN KU MIRAY,
WELIGAABA MEEL ADHI KA CIYEY,
CAGNA WELIGA MAAD DHIGIN ARLADA,
CASKA WAAGA DHAAXAAN WAX BADAN,
SI AAD U CABTO DHAAXAAN UGALAY,
CADOGA IYO DHAAXAAN WAX BADAN,
INTAY CAARA DHUUB IGU REDEEN,
COL DUULAANA DHAAXAAN DAGAAL,
DHAAXAAN DHURWAA KAA CESHIYO,
DHAAXAAN CARRAABOO WAX BADAN,
AAN CAGA CADDAAN KUGU WADIYO,
CABRAD GUURSO DHAAXAY TOLKAY,
AAN CAASIYOO WAALIDKEY IGA,
CADKA XXXXX SUULKU DHAAXUU I GO'AY,
CIDIYAHA WAX DHAAXAAN KU GURAY,
HADDAAN CUDUR KU DEYNEYN,
AAN CIBINA KAA WAABIN KARIN,
CISHIRIIN HADDAAD TIRADA GUUD,
CUNUG YARI KOLUU II DHASHOO,
CAWRALA INAAN KAA BAXSHIYO,

GUUDKA KA CIROOBEY
CIIDAN U XHAAYE
CAAJIS JIIFSADAYE
CIIDDA IYO HAWDKA
AAD BUR KA CANTUUGTO
GOOR CAWEYSINA 'E
DOOG KAMAAD CUNINE
MEEL CAGAAG BADANE
CEELKA KUU SHUBAYE.
MEEL CIDHIIDHIYAHE
TUUGA CAABIYAYE
SAANAD LA CABEEYEY
KAAGA CAYDHSADAYE
AARKA COOFKA LEHE
CEELALYO AHAAYE
CALALO JEEXNAAYE.
IGU CANAANTEENE
CADHOODEENE
CAARADAA HORE'E
SHILIN CASTAADIIYE
WEDKANA AANAN CELINAYNIN
CIIDAMADA EEBBE.
TAAGANTAHAY CAAWA
CAADIL IGA SIIYO
LAY INSHAAR CANABE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CALI MAXAMED FAARAX

WUXUUNA YIDHI;

WERISEY WALAALKEY RUMIYO,
WAXAA WIILASHAYDII KA HADHAY,
WAAYEELNA WAAN AHAY CIYOON ,
WIXII AAN SUGAA WAA QABRIGA,
WAXAAN GABADH AHAYN INAD DHASHANA,
WADNUHUU CISMAAN IGAGA YAAL,
WASIIRTAA HABLAHA AAD DHASHUU,
WEHEL KALE MA HAYSTAAN IYABA,
WEDKII HOOYADII DILEY,
WADEECADA KA DHAR INA CABDDAY,
WAX HADDII UKAA SHEEGTO,
AMA AABMI KALE II WARAMO,
WANAAG INA DHEXYAALAA MA JIRO,
WAXAAD IGA SUGTAA WAA WARAAQ,
KOLLA WAXANAD YEELEYNIN BAAN,
WEEDH XUN HAYGA ODHAN INA ADEER,
WEJIGA HAW XUMAYN YAAN QALBIGA,
IGANA QAADO WAANADU ADAY KUU ,

WAALIDKEY DHIMAYE.
WAAXIDKAA QUDHAHE.
MAWDKU WEERARIYE.
OO LA II WADOE;
ADI LAGAA WAAYE
WAANA KELIGIISE
WAALIDKOOD YAHAYE
WAXAY KU DHAATAANE.
INUU WAAYO IDIN DAAYO.
WAYGU WEYNYAHAYE
WAA WAHA INAADEERE.
INAD WAX YEESHAANE.
OO WALLAAHIYAHE.
UU WADAAD JARO'E
KAA WACDIYAYAAYE.
WEYDNA YUU NOQONIN
WAHAB KA SAARAANE.
WANAAG TAHAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY MAXAMED NUUR FADAL

WUXUUNA YIDHI;

LIXBAN ANIGA OO JIREY TASHIGA , LAYDHA IGA RAACAY.
IMINKAAN LADAADYADA HURDADA, LEDISTA DIIDAAYE.
AFAR LABA LIX GOOR BUU SIDAA, IIGA LOOGSADAYE
MARUUN IGAMA LIIBAANSANINE, WAY LADAABSADAYE.
HADDAANSE MAALINTII HORE LURIYO, LUR IMA GAADHEENE.
WEHEY LABIYO TOBAN GOOR MIYEY, LIIDNIMO I RAACDAY.
KAL LAXIIBA BAAN LEEYIHIYO, LAABTA XUUNSHADA'E.
LAXAWSIGA XIGTADA LAY GESHIYO, libiqsigaan EEDAY.
WAA WAXA RAG IGU LAACAYAA, LAXAM DHAQAAQAAYE.
MARKUU SIDA LUBADA QAAWANAA EE, LEYLKA SOCONAAYEY.
AAD LUQUFKA QOODHAHA BAQAAL, LULAYA MOODEYSEY.
HADDII AAN LINGAXO OO QALBIGA, LAHASHADOW DIIDO.
OO AANAN LUUNKABA KA JARIN, LUR IMA GAADHEENE.
INKASTAAB LADAADYO IYO SUBAG , LAQANYO DAACSIISO.
WAX LAASIMA NIN LIITIYO HAWEEN, LAAXINKOOD BADAYE.
LIBGAD IYO ABAAL XUMANA WAA LOW , U GOONIYAHE.
LEG NINKII U KARIYEY DISHAA, LIISHA DOQONEEDE.
NIMANKAAN DUKAAMADA LADLADAN, LABA LABOW SIIYEY.
NIMANKAAN LO'DAYDII CASAYD, LAANTA UGU JIIDEY.
WAX LA LIQIYO XOOLABA KUWAAN, UGU LAXAAD YEELAY.
ANIGAYBA LEEBKIYO WARMAA, II LISANAYAANE.
WAXBA NIMAN LILEYNEYNIN BAY, LUQADI X RAACEENE.
WAATAY LICIINKII MAQLEEN, LAABABKA LAHAAYE.
MA LIIBAANIHII DIIRIYAA, LOOX U BAABACAYE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CABDI FAARAX DIIRIYE

WUXUUNA YIDHI;

CAAD DA'AY CIRKOO SOO ONKODEY,
IYADOO CARAWTIINA AAN CEEL KASOO,
AY CAWSKA MEESHII LAHAYD,
CABBAAR GIBINA GOORTAY SIFAAR ,
CADCEEDDOO GABAABSIYA KOLKUU,
CAWAWEERTA GOORTAY WADADA,
COL AANNAAN FILEYN IYO MARKAY,
AY CAARA DHUUB NAGU RIDEEN ,
CALI IYO MARKAY JAAMAC GUREY,
EE CUMAR KELYAHA AY JARTEE,
WAA CAADADIISEE KOLKUU,
GOORTAY CABBAAR NAGU QASEEN,
ANIYO CAALINOO QUDHA MARKII,
EE NALAGA CAYDHSADAY MAHAYN,
KUWII CARARAY QAYLO ULA TAGE,
ANOO CAADIL BAA HIILIYA'E,
OO AY CAWEYSKII TAHOO,
CADDAYSIMO FARDA AH NIMAN WATIYO,
CIYOON BAY RASAAS KU HAFIYEEN,
ANNA CUUNKA KAGA SOO BAXOO,
CABDILAAHI IYO DIIRIYIYO CUMAR,
EE CAAQILKII MAXAMED IYO CALIBA ,
AY CAARSHE BAWDADA JARTAY,
CAWED BAAN LA SOO HADHAY, INTAAN,
ANOO CAAFIMAAD QABA NINKII,
CIMRIGIISA SOW INU MADHSADAY,

GOOR CASARA MAALIN.
FULIYEY.
CAASHA SOO GELISAY.
YARE CANTUUGEYSEY.
CANUGU SOO TUUNSHEY.
CAGAHA SOO SAARTAY.
WEERAREEN CADOWGU.
CUURAN GARANWAAYEY.
CUDUDDA NAAFAYSAY.
CANUGGA SII JIIDHAY.
FULE ISCAYNTAARSHEY.
MAARIHII CIYAYEY.
CUDUD NALOO SHEEGTAY.
CIIDAN DAAFACA'E.
CIDO AN DHEERAYNE.
CABANAYOO LIITA.
CAAWIN LA ERYAAYO.
CAYNAB BAA YIMIYE.
CIIDANKII BILE'E.
CAAWIYOO RIDAYE.
MARKAY LEEFTAY.
GEERYOODEY.
CIIRSADEEN ORODE.
CAYDHSHEY NIMANKIIYE.
DHEEHO COL U KEENAY.
MA'AY CADDAAN CAAWA.

WAA DHANYAHAY.

WAXAA MAANSADAN TIRIYEY SALAAN CARABEY

WUXUUNA YIDHI;

WANAAG MALE XUSEENOW ADDUUN, LA ISKU WAALAAYE.
HADDAAD FARASKU INU WEYNYIHIYO, WEHEL AD MOODEYSO.
WARAABUHUBA GALAB WAA CUNAA, AMA LA WAAYAAYE.
WAYAC CUDURBA WAYSAGA DHINTAA, OOF WAREEN MELEGE.
WAYBAARO GABANAA NIN BARI, WIIFSADAA GALABE.
WACDI SEBENBA XOOLAHA MARBUU, WEYD KA BIXIYAAYE.
TOL WIDHIIDHI GALAY GEED WAHDIYA, URURKA WAAYEELKA.
WIGLA JEEDAL LAGU TOOCIYUU, WERISA BOODAAYE.
KOL BARIIJO LAGU WAABIYUU, WABANE XOORMAAYE.
MARKAASAY WUXUUSHTIYO CUNAAN, HAADKA LOO WADHAYE.
MARKAY WERENWERYIYO QAYLO TIMI, WEGEN XIL LOO HAYSTO.
OO WEERAR DHACAY BUU NIN KALE, WELIGI FUULAAYE.
WEECWEECSI GABANUU FUDAYD, UGA WAREEGAAYE.
WAYDHOOQTAN DIRIREED HALKAY, WIIDO OLOLAYSO.
RAG IS WADA WAJIIRIYO ROGAAL, WARAMADOO DHIIGLE.
ADOO WADHAF SIDIISII ROGUU, UMAL WAREERAAYE.
ISAGOO WAJAQAY MEEL XUNBUU, WEGERED GOOYAAYE.
MARKAASUU WARAAR RAG U NOQDAA, WIIRO LA LAHAAYE.
WEJI GACALO WAYSAGA QABNAA, SHAY KASTOO WACANE.
HADDAAN WALAXDU GURIGIINA IMAN, KUMA WAREERSHEENE.
WAX KU SIIYAYAA IYO XIGAAL , IGU WARAYSAABA.
WAA UUN WEDYAHAN XXX SHAY ADDUUN, LAGU WAYIIGAAYE.
KOLA WAARIMAAYO'E ABTOW WERIS , HALAY RAACSHO.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY XARIIR AADAN
WUXUUNA YIDHI;

BELAAYO WAA MID GUDEYSIYO,
MID GUCLEYSA AROORYIYO,
MID GADIIDKA ORDEYSIYO.
MID GADIIDKA CARAWSANE,
GIDIGOOB HA KULMEENOO,
GUULIHII KU ABUURAY,
KU GAWDIIDI DUSHAADA OO
GUUTADAADA LA WAAYOO
GAALO KUU JEBI EEBBE OO
BBB GORGOR AAN LA OQOONINOO
GUUDKA KAAGA YIMAADA'OO
KU GURTAAN KU RIYOODAYE.
ISAGII KU GUMAADYEYOO,
GAAG YAR KAAMA U REEBO'OO
GOBLAN OO SAYIDKOW
GABAN KAAMA BANBEEYO'OO
HAW GALMOON BUMARKAAGA OO
GEELII AAD NAGA QAADAY
GASIINKAAD KA LIQDAABA
CUDUR GAARA AHAAYEYOO
GARGAAR EEBBAHAY WAAYOO,
HA GUULEYSAN WAQAAYOO
GAAJADAAD NA BADAYNA BBBXX
SIDAY NOO GURTEY UURKA
ADNA KUU GALACLEEYEYEEY.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY XARIIR AADAN

WUXUUNA YIDHI;

GUULIHII I ABUURAYOW

GACAN WEYNE ILLAAHAYOW

GAADIIDKAAN RARANAAYIYO

GEELII WAYGA IDLAADAYOO,

ADHINA WAA IGU GAABTAYOO

GANDAALEYDA LO'AADNA

GURIGEYGA MA JOOGTO'OO

ABIIDKEY MA GODLEYNINOO

DEYNKII AAN GURANAAYIYO

GASHINA WAYGU BATEYOOZ,

GURBOODKII YARYARAANA

WAYGU GEYDHANAYAANOO,

GUURTIDAAN LA DHASHAY IYO

GACALKAYNA IDAYRIYOO,

XIDIBNA II GURMANMAAYO'EEY

GAM'I WAAYEY ALEYLKIYOO

GIDIGEEDBA DHARAATIYO

GADIIDKII HADHSAN WAAYEYOO

GUCLE WAYGA DHAMAADAYOO

WAXBA SOO GASBAN WAAYEYOO

GUULIHII I ABUUTAYOW

GACAN WEYNE ILLAAHAYOW

GEYIGAAGA DHAMAANBA

GUDIHIISA MID JOOGIYO

KAN GUUDKIISA KU NOOLBA

GASIINKOODA ADAA [redacted]

GIDIGOOD WADA SIIYA'OO

GAAR ADAY BARYADAYDU

GOONI KUUGU AHAATAYOO

GARGAAR KAAGA WANAAGSAN

GAMCOW HOORSANAYAAYAAN

GALAD KAA SUGAYAAYEEY.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY ISMAACIIL MIRE

WUXUUNA YIDHI

KULIGOODBA AADMIGA,
RABIBOW QAYBSHEY KIBISTIIYE.

BAD KALUUN KU JIRA KAY KU TAHAY,
AMASE KOOB SHAAHA

NIN WALBAAN WIXII LOO KATIBAY,
WAALA KULANSIINNE

IN KASTUU KALAHO AMA KABTIYO,
AMA KUR DHEER FUULO

NINA INANU SOO KORODHSANAYN,
KAA HALA OGAADO.

AF XAKAME KARKABADII U AY,
IYO KULAYLKIIYE

KA DANBEE CALUU YIDHI,
INTUU KAAHA GUURSADAYE.

ISNA KAAL U TUMAY OO MARKAA,
KARINA WAABAYE.

KALUUN SHARADDI BUUXDUU AHAA,
KICINA SHAYDAANE.

RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.

KELYO CAANO GALAY BAA NINKII,
KICIYEY DHEERAAYE.

CARTAN DHUURTA KOORAHA MARKUU,
KOR UGU LAALAAYEY.

GARAAD FAARAX DHAY KARUUR,
KALA MACAANAAYE.

MISNA KALA QADHAADHAA DHUNKAAL,
KULANKI GOOBEEDE.

RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.

NIN KARAASAN OO KIBIR QABAA,
KAADSAN KARI WAAYE.

SHANTII KOOSE REER CALI GEREE,
KAW ISKAGA SIISAY.

KASI WAAYE WUXU WAA QABAAL,
WAANA KABATAANE.

RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.

NINKII KOOB NIMCA AH FOOQSADEE,
KADIN IRMAAN MAALAY

IN KARUURKA UU QUBO HORAY ,
KAAFKA UGU TIILLE.

KAMA SUGULE MAANTII SIDII,
KUREY CARUUREEDE.

RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.

KULIGII WAXAA ROGEY ANAA KIINA,
REER HAGARE.

RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.

KELMADII U YIDHI INA GALAYDH,
KOHAY GADAALKIIYE.

KAARKUBA MA JOOGEEN HADDUU,
KEENO TULUDIIYE.

BAALA CAD KELYAA KUMA JAREEN,
KII ARSAA-ILAYE.

RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.

KAAKICI WADAADKII DAGAAL,
LAGUNA KAALMEEYE.
KUN MALYUUNA OO DUUB CAD BUU,
KEENAY BEER DHIGA'E.
WAXSE KADABKI GO'AY MAALINTUU,
KADAY RAGIISIIYE.
WAX KABAALKI JABAY WAA MARKUU,
KARIYEY REER KHAYRE.
RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.
KEYSAHA ADDUUN INA AMMAAN,
KOOS DHAN BUU HELAYE.
RAGBA KEENO GELI BUU IS YIDHI,
WAA U KORAYSAAYE.
ISBA KII ARSAA-ILAY MA HADIN,
KAMANA YAABEEYNE.
RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.
ANAA DUNIDA KELIGEY LEBAA,
KOOFIL EERSADAYE.
KASHIISABA MA GELIN WIILALBAA,
KEEBKA KUU QABANE.
RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA,
KAA HALA OGAADO.
NIN KUWAAS KA DHIGAN BAAN ARKAAN,
KADAB U NOOLAYNE.
KARAYSUHU INTAY BUUXSAMEEN UU,
KAMAN WANWEYN YEESHAY.
YUU NIMAN KARAAMIYO COLBA LE,
KIISH KA BUUXSADAYE.
KA SHIB DHAHA ISLAAMOW NAFTII,
KII LADNAA GADAYE.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY
XARIIR AADAN WUXUUNA
YIDHI;

ILEEN BAALI HAWEENA
BAFTADAY XIDHANAYSO
BAR MADOW KAMA WEYDIB

ILEEN BAALI HAWEENA
BUULKI AY DHISATAABA
BARBARKUU KA DALOOLIYO
BOODH KACAAYA MA WAAYO.

ILEEN BAALI HAWEENA
UBADKII LAGA BEERAY
BASARKOO KA XUMAADIYO
BUS KU YAALA KORKOODIYO
BALQAN DUUF KAMA WEYDIB.

ILEEN BAALI HAWEYNA
BARBAR NAASKU KA MUUQDIYO
BOGGOO QAAWAN MAWEYDO.

WALLEE BAALI HAWEENAAN
BARBARKAAD ISKA TAAGTABA
BAYLAH AAN LAGA WAAYIN

WALLEE BAALI HAWEENAAN
INKASTOY BERYO MAYDHO
BILIC YEELAN KORKEEDU.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY

ISMAACIIL MIRE WUXUUNA YIDHI;

NIN WERWERAYA BAAD MAXAMEDOW, WEER U XIDHATAANE.
WAAYADATAN MAANSADUNA WAA, IGA WAYIIGNAYDE.
JAHAADKII WADDADA DHEER MARAAN , WELI U JEEDAAYE.
WEJIGOODU GUBEYGII HADDII, WEERAR LAGU QAADO.
WAYRAXA LA SOO TUBO HADDII, WIIDO OLOLAYSO.
WAYSAAQA DIRIREED HADDII, SUMUCU WIIFLEEYO.
WAAXIDOW ALLAHAYOW ADAA, LAGU WAKIISHAAYE.
EEBBOW WALAALAHAY QUWEE, WAHANTAY LAABTIIYE.
WARSAMIYO XUSEEN IYO SICIID, WALAFTANKII YUUSUF.
WABARKII OBSIIYIYO CASHUUR, WARAMADII CIISE.
WANAAGII HURUUSE IYO DHEEL, WEREFTANKII XAASHI.
CALIYAAN U WAALANAHAYAA, WEHESHIGOODIIYE.
WAXTARKII DUCAALIYO HAYAAN, WAANADII MAXAMED.
IYO WEYRAXII NUUR WARSAME, WADANIHII AADAN.
AMA WIILASHAAN GARANAYIYO, WADAR DHAMAANTOOBA.
WADNAHAY QADH-QADHI JEERO , AY WADA YIMAADDAANE.
EEBBOW WAX YEELANA KA DHAWR, HANA ISWAASIININ.
WAXBA IMA TARAAN CAANAHAAN, WABAXSANAAYAAYE.
DHALIINTII AN SOO WAABAN JIRIN, WOW WELWELAYAAYE.
WAR BUSHAARO EEBBOW KA KEEN, WAAGA BERIGIISA.

WAA DHAN YQHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY ISMAACIIL MIRE

WUXUUNA YIDHI

CALIYOW XUSUUS KUGU DILEE,
WELED XUMAADAAYE.

XALUUN BAAN XADIIS GABAY LA KACAY,
OO XAFIILTAMAYE.

DHAQASHABA HA XAALAYSANINE,
MAQAL XURUUF TAYDA.

CABDI IYO XUSEEN IYO XIRSIBA,
KAA XUSUUS BADANE.

XADKA QABADA NIMAN BOW GUDBOO,
SOO XANKAABSADAYE.

NIMAN BAA XIJIGA IIBSADIYO,
XABAG QADHOOMEEDE.

NIMAN BAA XAFAARKA U GUNTADA,
OO XABAAL QODA'E

NIMAN BAA DIYAARADO KU XIDHAN,
XIIMA SAMADAASE.

NIMAN BAA XARAGO QUUDHSADOO,
XAARKA IIBSADA'E.

LIIRAHA RAGBAA XAMAR UTEGEY,
XEEB INTUU MARAYE.

HABLAHA XUURAL CAYNTA AH RAGBAA,
XEEL KU GUURSADAYE.

XAAJI NIMADA NIMANBAA KU TEGEY,
XAD IYO LAANDEYRE.

WAX DHAAXAAN XIDKAHA KUUGU XIDHAY,
XAALUF IYO BOOGE.

WAX DHAAXAAN XAGAAGII WAN WEYN,
XAWDA KUU JARAYE.

WAX DHAAXAAN SENGAHA XOOBIYOO,
KUU XABAADH RIDAYE.

KULAY XAAWALEY TAHAY DAB WAA,
XAGAFSANAAYAANE.

SODON GU'BAAN KU XAASAANSHEY IYO,
WELIBA XAABXAABE.

KUGU XIIQAY SIDAN KUU LAHAA,
XAAXEYAHAY TOOSE.

XAGUUN LABADA DAAROOD KU DARAN,
HAYS XAKABADAYNE.

WAA DHAN YAHAY

GABAYGAN WAXAA TIRIYEY ISMAACIIL MIRE

WUXUUNA YIDHI;

NUUROW ADAA LAGU DIROO ,
QABAN DARIIQIIYE.

ADIGAA DARMAANTII QABSADAY,
IGAMA DUULOWE.

MARKUU WAAGU DAALACO ABAA,
DAWGA SII MARIYE.

IKHWAANOW DARIIQAY JIRTAA,
DAHABADAY DIIYE.

DAN LA'AAN HADDEERAY U DHIGI,
DAMAL KARUURKEEDE.

OO AY DABAYLAHA KA GELI,
DAHARKI WEYNAAYE.

SADDEX DAYRA DAYROOD MA ARAG,
ANIYO DAWLAABE.

DACALKAAN KASOO JIREY INDHUHU,
DAALE GABADHIIYE.

HADDAA DHOGOR DUBAAXLEY QALBIGU,
DALANKACAAYAAYE.

DUUNKAYGU JEERUU U TAGO,
DULUGLE WEEYAANE.

CUDUR DUUMO SAY TAHAY ANFACO,
WAANAY DEYAHAYNE.

DANABKIYO RAGAYGII LUMAY,
DUUDSI LEEDAHAYE.

WAXAN DIIDEY ANIGOO YAR BAY,
ILA DAMCAYSAAYE.

DOOC IGAMA OGA NAAGAHAA,
DIIRKA SHIDAYAAYE.

NIN ASTAADKU SOO DIRAYO,
OO DEYRAN BAAN AHAYE.

DALKII QAATAY IYO KAYMAHAAN,
DOOFILKII DHIGAYE.

DURGUFKII KA HADHAY GAALABAAN,
DOY KA RIDAYAAYE.

DOOYADA ILAALADU WADIYO,
DOOXATAAN AHAYE.

DAYAC TIRA DHE REERKII INTAAN,
DIBADDA MEERAAYO.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY ISMAACIIL MIRE
WUXUUNA YIDHI;

WAR NINKII IGA DOONIYOW
ANOO DOOLO U JEEDA
GOORUU WAAGU DILAACAY
DARAAWIISH BALAMAYNA
DELEB HEENSAHA SAARAY
ABDUUN SAAD KA DAMCAYSIYO
DANDAMBAYSI MA YEESHO
WAA DAWAARRO SIDOODA
DIGTA WEERAR NA GAADHEY
MAAJOOR DOORA QUDHMUUN IYO
DOOFAARTII RAXAN WEYN IYO
MAJEERTEEN DUNJIGIIS IYO
DAACUFLEY ASKAREED IYO
INA DIINLE DHASHIISIYO
DULMI NOOGU HESHIIYEYOO
DUULBA MAALIN NA BEEGAYOO
BERYEY DEEX HOGANEYSEYOO
DUDADII U ROGNEYDOO
CANDHADII DUBAYODAYOO
DAAQSIN AANAY U FOOFINOO
RASAASTII DAM LAHAYDOO
DAGAAL AAN KULA ROORAYOO
BAQIHII LA DILAAMAYOO
DABKII AANU KA REEBNAYOO
DERBI BAAN LA MASEEYEYOO
DAARAHAAN KU RASAYNAYE
DAAYINOW MAHADDAA.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY WEERAR BULXAN

WUXUUNA YIDHI;

WAR NIN NINKII NAGA DOONIYOW,

DANBAR SHIIL IYO DHAYLIYO

DAMAL HAAD IYO DEYR IYO

DIBIRKII DHAFARUUR IYO

DULIHII CARCARAAF IYO

DUUD WEYN BAANU AHAYN

MEEL DAREEMIYO SAACLIYO

DUURKA OO YAR MADOW IYO

DEEGAAN BAA LAGA JOOGEY

DADKANA HAATAN BELAAYO

DADAB BAY U GASHAAYE

NIN IYO REER DUDADIISA

WAX SOO DAAKHILAY MOOYEE

DAREEN WEYN MA OGEYN

NIMANSE REER DALAL SHEEGTA'OO

DOOLAHAA MIDIG YAALLA'OO

DIIGAANYAALE KA FOOFO'OO

IN LA SOO DURKINAAYEYOO

MAKAAHIILNA DILAAYEY

MAXAAD ROOGNA DAGAAYEY

WARKAY NOOGU DAREEN

DIDNAYOO UMALAYNAYOO

DERMADII QABAN WEYNAYOO

DUHURKII TUKAN WEYNAYOO

CAANIHII HABHA DEERO

BEGNAA NOO MARI WAAYE'OO

KUMA DIIMI SAMAYNO'OO

ANUUNBAA DAYIXII IYO

DAWGAA SOO MARIDDIISA

DURBA HAATAN JECLAADAYOO

SIBRAARKOO DUNDUMEYSAN

HEENSOHOO DIBAD YAALA

NINKII DAABAB LAHAAYOO

DOONTAY OO KU MAQNAA

DAGAAL BAANU OGEYNE

YAAN HORTIIN LA DAREERIN

DAD SALAAMAD AHAABAAN

DUQAYDII KA WADNAA.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY XAAJI YUUSUF

DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

RAGGAAN AANO GUDAN BAY MALAA, NAGU ASTEEYEENE

ANIGUNA WAXAAN LA IRKIGAA, AALABDAAN SIDO'E

ALBOQRIYO ANCAAM IYO TAN IYO, SUURATUL IKHLAASKA.

IYO LABA HADDII LAGU AKHRIYO, CADOWGU AAFOOBO

INTAABAAN ALEYLKII AKHRIYEY, AMIN DHEXAADKIIYE.

ASALKAYGU MEESHUU YIHIYO, AWLIYAAN KICINE.

AAMIINNA II DHAHA TIXBAAN, SII ARSILAYAAYE.

BICIIDYAHAN UFOODIYO BARIYO, URURTA DIIN EEDA

ABAABULINTA DUULAANKA IYO, AXDI FURKII EEDA.

JAHADAA USOO IILATEEN, ABARSHIHII EEDA

NINKII GEEDKA OOGADA KA MARAY, EEGA HORE EEDA

LABADAAD KU EERAAMISEEN , RAADKAYAGA EEDA

WAA NUGUL ADOOSHAAN DAD WADAN, ODHAHTIDAA EEDA

AG FADHIISIGII FIIDKA IYO, AAMUSADA EEDA.

AADAANKA SHEEKHII XARDHEE, AAD U SAXAY EEDA

AAMINA IYO ILALKAAD GASHEEN, ODAYADAA EEDA

KUTUBAHA ABOORKII CUNIYO, AAYADAHA EEDA

ABXABBAAD NA RIDIQDEEN, SIDII GAAL ASLIYA EEDA

XABADDII ISMAACIIL DISHIYO, AMA JOGTII EEDA

RATIGII AW BAAREERYEY IYO, ALA BASKII EEDA

UUGAAMINTII NAAGIHIYO, IILASHADA EEDA

IBRAAHIIMKA SOO MARINTINKIYO, AAMINSIGA EEDA

ADHIGII GALLAA IYO BADKAAD, ALAMSATEEN EEDA

AFKII AAD KU MAASHEEN SIDII, OKHOLIHII EEDA

OONKII DANOOD LALA GALIYO, OLOLOGTII EEDA

ISHINKII SHANLEY LOO HELEE, LAGU OGAA EEDA

ABA YOONIS BAA LAGA HELIYO, WEEDHAYADA EEDA.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY CUMAR SHEEKH CASHUUR WUXUUNA YIDHI;

BARKAD IYO MIYUU BAHARARSAME ,
BIIDNA TARIWAAYEY.

BAARUUDDA MAXAMUUD MIYAA ,
BEEG U RIDI WAAYEY.

BILI WEYNE REER HAGAR MIYAA,
BAQE LA SII JEESTEY.

BURUUDKOODA NIMANKAAN OGAA,
CALI MIYAA BAAQDAY.

BAASHAA UGAASYADA DEGEE,
HAWDKA BARI YIILEY

EE BAASKA LOO DOONI JIREY,
SOW MA BILI GUURIN.

SOW BAASHAYAAL KHAYR CABDINA,
SOOMA BIXI WAAYIN.

BAXSAD AAWADII ODALI SOW ,
BOOKH KOR UMA DHAAFIN.

BILAAWAHA RAGII QAADAN JIREY,
SEEFTA BELELEYSA.

BUUHOODLE SOW LAGAMA RARIN,
KHAALID BADHIHIISA.

LAFA BUURANOW SOW HAYAAG,
KII BERDEDEY MAAHA.

BAABUURTA NIMANKII LAHAAYE,
GEELA BADAN HAYSTEY.

SAW LAGAMA BAYDADIN DHULKAY,
DEGI JIREEN BEESHU.

BADHTANKEEDA CAYN IYO BARMAHA,
BUURIHII ILAHA.

BIYII CAYNABIYO SOW NUGAAL,
BAALAADHSAN.

BAJAR SOW RAG KALE KUMA TUNTAAN,
INA BILOW MAANTA.

BADANE JAAMAC WELIGII MA DEGIN BOOKH ,
INTUU TEGAYE.

BIYA WAA HARRAAD SOW MA MADHIN,
OONKU WAA BELO'E.

BANAAXIGA LO'BOODII BADNAYDEE,
BOODHKA KICINEYSEY.

SOW BAHAL BHURWAAYIHI WADDADA,
BADI MM KUMUU LAYNIN.

SOW BALASLOHOODII RAG BADAN,
BIRI MA AY LEEFIN.

WAA BAYLAH ARADKII BILAASH,
BOWGA CARARTEENE.

MA BUURBUURA CALIYOW RAGUYE,
BADIBA WAA YEENE.

MA BALAADHNA OO LAGUMA OGA,
BAAXAD IYO XOOGE.

MA BADNA'E HADDAAD TIRIN LAHAYD,
WAA BADHKIIN QUDHA'E.

BILLAAHAAN KU DHAARTAYE CABDOW,
BA' IYO HOOGIINA.

BISINKABA MA AYDAAN SUGINI,
WAYSKA BAQATEENE.

NAFTUSE WAA BELAAYO'E HADDII ,
UU WABNUHU BOODO.

BAARUUDDA IYO SHOW BUNTUKHU,
KUUMA TARO BIIDNA.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY CALI CUMAR XIRSI
WUXUUNA UGU GABYEY NIN LA ODHAN JIREY CUMAR CABDILLE MAR
UU AFLAGAADEEYEY NIN WADAADA, WUXUUNA YIDHI;

NINKII SEEXDAY CUMAROW HADDUU SXRXXXXCOB, SARA KACOO TOOSO.
SUUBANE ILLAAH KAMA BEDELO, SUU AHAAN JIRAYE.
SAWD XUMADU WAATAAD KHALQIGA DHAN, ISKU SEEGTEENE.
SAAKANA KAN AAD KU HADLAYSAA, WAA SARIIG LI'IYE.
ILLAAHAY MA SIMIN OO DAD WAA, KALA SAREEYAAYE.
QAARUUU SIDOODABA KA DHIGAY , SAANI IYO TUUGE.
OO AAN SIDAADAA XABLAAL , SAAMI KULAHAYNE.
NIN SIDEETAN JIREY OO SIDUU , DOONO U HABLAAYA.
OO AAN CODKIISABA SUGAYN , SAMANA LOO DIIDEY.
WAA SAYMO WAAYEEL NAFLAHA , LA ISA SEEGAAYE.
SAATIROW ILLAAHEEN NIMUU, SAXAY IMAANKIISA
SIINKII QURAANKIYO NIMUU, DEREJO WEYN SIIYEY;
OO AAN SALAADIYO KA TEGIN , WAAJIBADA SAARAN.
SAWA MAAHA ADIGOO KALIYO, RUUX SUFIIHIYA'E.
HA SADHAYN NAFLUHU WAA YAQAAN, WAANA SAACIDAYE.

WAA DHAN YAHAY

WAXAA MAANSADAN TIRIYEY CALI CUMAR XIRSI MAR NAAGTIISU
KA CADHOOTAY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

KADEED ADIGA OO QABA INTAY, DANI KU SEETAYSAY.
OO INU KU KAABIYO KHALQIGA, KAALMO UGA BAAHAN.
KII WALIBA KUU KAA X XIGUU, KAAGA DHOWYAHAYE.
INAANAY KUU SINAYN AADANUU, LAGA KADEED BEELYE.
KUBKA MAALINTII AAN KA JABAY, UU I KALA BOODEY.
AY IGU KULMEEN XAALADAA AAN KA, X KICI WAAYEY.
KURBADII I HAYSIYO MARKAAN, KAARKA LEDI WAAYEY.
KALGACAYLKA XIDIDKAAN U QABEY, IIMA SOO KICINE.
KORKAYGABA MA IMAN HOOYADAA, KAY DHASHIYO NUURE.
WAXAY KABAY KU UUR ILA GALIYO, KOOX XIGTA AHAYDE.
WAABA IGU KAJIMAY MAXAMEDKII, AAN KU KULULAAYE.
KORAMADA NINKAAN SIIN JIRIYO, KAAFI SIDIGTEEDA.
KOBTUU IGAGA TEGEY WAAD OGEYD, KAARSHE INA NUURE.
KAFTAN HADALKA KII AAN GELEYN, KAAHA HAY ODHANE.
KASHA WAXA HURDIYO WAAD OGTAHAY, CIILKA KAYDSAMAYE.
KARIIMKAA LAGUGU DHAARIYEE, HAYGU KAAKICINE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI WUXUUNA KULA

HADLAYEY XIRSI CARTAN (JEEDLADE) WUXUUNA YIDHI;

RAG NIMAAD JECLAATAA JIRAAN,
OO UU JAHAAD IDIN DHEX MARO,
MID KALAA JIROO AAD LAHAYD,
OO AAD JECLAATAA MARUUN ,
WAATAYDIN JAMATEEN INTAAD,
EE AAD JIKAARTEEN RAGII,
AAD UGU JAWAABTEEN ,
JAHAAD BEENA WAATAW GASHEEN ,
JUQ MIYAA TIDHAAHDEEN CADAAB,
JIDKII TOOSANAA MAXAMED SOW ,
SOW IDINMA JEBIN OO IBLEYS,
SOW JAAHI GUBEYGII FALLAA,
JIDHKA DEBINTA SOW QOOMAMADA,
KOLKUU JARAHA KUGU SOO QABSADAY,
SOW JAAHILNIMO WAA XXXXXX XUNTEE,

JAALAHAA NOQONE.
MARAD IS JIIDHEENE.
JAAHI GUBAYGIIYE.
JAAR AD NOQOTAANE.
WADA JIBOOTEENE.
JEER IDIIN DIGAYE.
JANAA DAGATAY OO DHOWE.
NAARTA JOOGSADE'E
ADIYO JAALKAABA.
IDINKAMUU JEEDIN.
MEEL XUN KUMA JOOJIN.
KUUMA TUMIN JAAWO.
MAANTA JARIMAYSID.
JEEDLADOW MAXAMED.
JUUQ MA ODHANWAAYIN.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRISAY HAWEEN AANAAN MAGACEEDII HAYN
MARKUU KA DHINTAY NINKEEDII OO DAAHIR LA ODHAN JIREY HASE AHAATEE AANAAN INAANYIHIISII HAYNI, HADDABA SIDA LA SHEEGAY WAXAY NINKA U LAHAYD LABA WIIL HASE AHAATEE WAX ADDUUNYO AH UGAMA TEGIN. MARKAA NIN AY WADA DHASHEEN NINKII DHINTAY AYAA HAWEENTII QORI U CABAYSTAY OO YIDHI WAA KU DILAYAA HADDAANAD XOOLIHII WALAALKAY KA DHINTAY SOO SAARI; MARKAASAY GABAYGAN TIRISAY WAXAYNA TIDHI.

DUUGUU KA TEGEY BAA NIN RAGA, DAD ISKU RAACAAYE.
OO AY DURIYADDII U DHALAY, DIB UGU AYDAAYE.
ABIIDKIIBA DABAD BUU AHAA, DEREJA WAAYOWE.
DAWERSUU KU NOOLAAN JIRIYO, TUUGSI DIBADEEDE.
MA DAREERIN WELIGII INTUU, DAAWAD FOOFSADAYE.
UMANA DAAQIN ABIDKIIBA LO'I, DOOXO ROOB HELAYE.
ANOO DAACADNIMO KUU WARAMAY, HAW DANIYIN BEENE.
ANIGAB QABRIGU WAY DIYAAR , DAAHIR KUU GALAYE.
DENBI KAYDSANMAAYIYO CADAAB, DAAKHILKEED KULULE.
HADDAAN DAALIN AHAY AAN ILLAAH, DIB UGA YAABAYNIN.
AAN KAA DAFIRAYOO QARSADAY, DUUNYO DHAXALKAAYA.
RABBI HAYGA DABAR GOOYO KAAN, DHAQAY DUCAALOWE.
DIRICYAANBA KUU KORINAYAA, HAYSKA KAY DILINE.
ANAAN XOOLO KAA DUUDSIYEYN, KAAGA TEGEY DAAHIR.
DUNBUKHAAD CABAYSEE WADNAHA, SAARAN DACALKIISA.
DULMI HAYGU TOOGANE KA QAAD, WAA DIGNIIN DHABAHE.
AMA KEEBKA DIB UJIID ILEEN, MAWD MA DIIDANIYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CALI CUMAR XIRSI
ISAGOO KAGA CABANAYEY HAWEENTII UU MARKAA
QABEY MID KA DHIMATAYNA UGU CALAACALAYEY
WUXUUNA YIDHI.

RUNTII LA ISKU SEEG,
SU'AAL BADANI WAA INA CALAY,
SUBAX NOOLBA WEYDIINTAN AAD,
SABAB WAXAY U TAHAY HADALADII,
WAXAAN DAAHA SAARABA HADDAAD ADIGU,
ANNA SAHAL JAWAAB SHAAFIYAAN ,
SAWD YAR IGA MAQAL XAAJADAAN,
SAXAR MIDANAN WELIGEY KU ARAG,
DHADHAN LAGU SALUUGANA LAHAYN,
SAAMIGA HAWEENTAAN U HELAY,
SEDKAAN UGA BARTAA MAQAN JANADA,
SINTA IGAMA SOO BIXIN LAFUHU,
SARARIHIYO WAATII MISKAHA,
FEEDHAHAN SARIIGANI WOQOOD,
SALIILYAAN KA QAADAA CUNTADA,
SADDEX INAN QADAA IIGA ROON,

BEENNA WAA LAGA SARIIGTAAYE.
SAHANKA CEEBEEDE.
SOO KALIHINAYSO.
II SIRTA AHAAYE.
SOO SAARTAY
SAAKA KUU ODHANE.
KUU SARSARAYAAYE.
DHAGAX YAROO SAARAN.
SOORI WAA BAMACE.
SAWJABBII DHIMATAY.
SAANI LOO GELIYE.
SEBEN HORAADKIIYE.
HILIBKU SAARAAYE.
SAATAN MAY NOQONE.
TAAD ISIISABA'E.
SOOR XUN QAMAREYE.

WAA DHAN YAHAY

WAXAA MAANSADAN TIRIYEY NIN LA ODHANJIREY CILMI NUUX
WUXUUNA U TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY SAALAX CALI OO AY
WADA DEGANAAYEEN, DABADEEDNA UU KA GUUREY ISAGA OO AAN U SHEEGIN INUU KA GUURAYO. MARKII UU ARKAY CILMI OO REERKIISII RARAY AYUU KU YIDHI MAXAAD IIGA GUURTEY MARKAASUU UGU JAWAABEY MAANSADAN CILMI WUXUUNA YIDHI.

SA'DA GABAYGA WAATAAN KA TEGEY,
WAATAAN SILSILADAA U JARAY OO,
SU'AASHAADAN WAA INAN DARTEED,
SAWD YAR IGA MAQAL WAA JAWAAB,
SAMIR NIMAN OQOON LALAMA DEGO,
SARMO UBADKA KALA GAADHEY BUU,
MAR HADDAANAB SOORYEYN KHALQIGA,
SAAMINA KU LEEDAHAY MARTIDA,
AAD IILA SIMANTAAN LIBTII,
AAD SOCOTADII REERKA IYO ,
SOOFKAYGU KAAGUU U NOQON,
SIDIISABA WALAAL LALAMA DEGO,
GEEDIGA SIRTAH AH WAXAN U RARAY,

SIINKA MAANSADA'E.
KA SAAHIDAYE.
SADAR KA SHEEGAAYE.
INAN KU SIIYAAYE.
SAALAX CALIYOWE.
II SIMAY ODHANE.
SOCONAYEE BAAHAN.
HILIBKA AAN SIIYO.
CIDINA KAA SAARIN.
SAHANKA DIIDEYSO.
SAHAY DHAMAANTIISE.
RUUX SIDAADA AHE.
DHAWRKAN SABABOODE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI

WUXUUNA YIDHI

SHAFKA NIMAN KA DHALAN BAA WADNAHA ,
SHIILI KAGA TAALE.

MA SHAKIYO TOLKII NIMU ARLADA ,
FARO U SHEEGTAAYE.

SHINIDABA XIGAALKAY KA BADAN;
SHIRE XUSEENOWE.

SHIL HADDII U DHACO OO RAG KALE,
LAYSKU SHBAKOOBO.

IYAGOO SHAN QAAD IYO KA SIMAN ,
RAYFAL SHARAF WEYN LE.

SHAKADAHANA BUUXSADEY FAKHRIGU ,
MA U SHLAADAYNE.

SHALMAD FARASLE IYAGOO KA SIMAN,
SHAYBE IYO WIILBA.

OO SHIISHKA AAN CIDI LA DHIGAN,
WAA SHIRABAN YIINE.

SHAMSADOO MARKAA SOO DHOWOO ,
SHAACU KA IFTIIMAY.

SHAMAREERYEY AADMIGU MARKAY,
SHIN U DAREERAANE.

NIMAY SHARADDI BUUXDAY DAGAAL,
SHIR UGU QAATAANE.

SHAKI MALE NINKAY WEERARAAN ,
DIB UGA SHEEKEEYE.

SHANTA WALLEE NIMAY ULA TAGEEN,
SHIDE DHARAARTAASE.

SHISHEEYIYO SOKEEYABA KHALQIGU,
SHUUFYEY OO ARAGYE.

SHARCI DAWLADEED IYO HADDAANAY,
SHOOKI KA CABSOONIN

AMA AANAY SHEEX KAGA MAQNAAN,
WAA GOB SHUQULKEEDE.

SHAREER MEELA HAWD WADA SHAMIRAN,
OO SHIKABAN GEEDO.

INTAY SHAWSHABAAN WIILAL KALE ,
SHEEMA IYO DHEEHO.

SHAN WALLAAHI INAN AADMI KALE,
SHIRA KU MAALEENE.

SHIGSHIN ANIGA OO WADA RAGII ,
LAYSU WADA SHEEGAY.

SHANLE OLOLAYIYO WAXAY SITAAN,
SHAYGA CAANKA AHE.

KOL HADDAAN SHANSHADA SOO QABSADO,
SHAAXIN DIRITEEDA.

INAAN SHEEMA WIIL KALE LISAYN,
SHAAHID WAA ADIYE.

SHIDA LI'I INAAD AAMUSTAA,
SHAALE KUU WACANE.

SHAASHLAHA LIBAAX LAMA QABSADO,
SHAARUBAA SARE'E.

SHIB INAAD TIDHAAHDAA WALLEE,
KUUGU DHOW SHARAFE.

WAA DHANYIHIIN

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI

WUXUUNA YIDHI;

XA'DA GABAY XISAABLI'I NIN GALAY, XARAF XX HABOWSIIYE.
WUU KA XAWISHMAA WIILKI AAN, XARAKADAYNAYNE.
XUBINTIISA LAMA DHAAFIN KARO, XEERKI LOO DHIGAYE.
XARAGAA MURTIDA LOO TIRSHAA , TII XAQIIQA AHE.
XANTATOOBSI IIGUMA BAXDIYO , XAABSO IYO QAADE.
XIKMAD BAAN ABUURAA HADDAAN, XIISO MAANSADA'E
XALAY WAXA IQAABILAY MIDAAN, QAYB U XAAFIDAYE.
XADHKAA BAL AN KAFURO WAAYO, WUU IGA XABAASNAAYE.
HADDII LABA QABIILOO XINTAMAY, XAALKU KA QALOOCDO.
XEER BEYGTI ODAYAALA BAA, XAAJADOOD GALA'E.
XOGOGAALKU GOORTUU WARAMO, EE RUN LA XAQIIJO.
XIL DHIBAANO DAACAD IHI WAA , INAY XADEEYAANE.
XEEBASHIYO HADDAY EEX GALAAN, XUMO MA JOOJAANE.
XAQIIQ NOQOY WARKII INAY GEFEEN , SHALAY XMM XUJAAJTIIYE.
XIIS LAGUMA DIRIREEN HADDAY, XAQA CADDEEYAANE.
XARBI IYO DAGAAL KKAMA DHECEEN, XAGIDI TAAGNAYDE.
XABAALAHA RAG KAMA BUUXSAMEEN, XALAY FAYOOBAAYE.
XISAABTOODI QAATOO IYAGU, KUU XUKUME GEELE.
XINIINYAHA RAG LAMA TUUJIYO, MEEL XANUUN BADANE.
GOB XANAAQDAY WAA CAADADEED, XAASHIYOW TANIYE.
XOOLO KAMA DAMAACIYO RAG KALE, XOOG NINKII YARIYE.
XULA AADMI KALE XOOGSADAAB , U XUSLINAYSEENE.
XALAASHIINI WAATAA RAGGII, XERO U OOTEENE.
XEJIN WAAYEY GEEL NIMAN TOLKII, LAGU XURMAYNAYNE.KRKXMXRRXXXXXIGXXRRXKMRMXXXRXXMXY
KOL HADDAY XIGTADU KUGU YARTAHAY, KUU XASILI WAAYE.
XIDID KUU DHACSHANA KAMA U DHALAN, XAASKA KUU DHAXAYE.
XADHIG QAADO OO DABO ILEEN, XOOGSI KUU FURANE.
AMA XAABO GURO YUULADAA, LAGA XARAASHTAAYE.
SIDII NIMU XIGAALKII BAD YAHAY, OO XABADO HAYSTA.
KASOO XAABI WAATAAD DORAAD, XILO FUREYSEENE.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI MAR NIN
LA DILEY LOOGU SOO WARAMAY WUXUUNA YIDHI;

GUDOODIGA WARKII AAN KU HELAY,
EE GUREY QALBIGA EE DHAMAAN,
IGA GURA GUDOON DHAHA INTII,
GO'YEY BAA LA YIDHI INA CALOW,
WAX LA YIDHI GADIIDKI SHALAY,
WAX LA YIDHI GODKUU XALAY KU JIREY,
GARABKAYGA KAA TAAGAN EE,
WUXU YIDHI WAR GABANAAN U SIDEY,
GOB MADOW HALKEER IYO SHALAAN,
GASIIN IIGU LAABANI MAJIRO,
GIRIS MAARLE BAA IGAGA YAAL ,
GUDIN BAY MISKAA IGU DHUFTEEN,
GUUX WEYN RASAAS IHI HADDAY,
GARKA WADANE MAADHIIN HADDII,
GOBANIMO HADDAY IIDILAAN,
GODKU IMA CIDHIIDHYEEN QABRIGA,
ANAAN GO'IN XINIINYAHA AYEY,
GAWSAHA WAXAA IIGU JIRA,
CADBANA GOONI BAY II JAREEN,
BERRI GALAB KALKIYO GOOR QORAXI,
GADHLEY ILA DA'AADIYO HADDII,
OO AANAY GARABKAYGA IMAN,
GORGORKIYO WARAABUHU HADDAANAY,
HADDII AAN GURYAHA REER CISMAAN,
RAGII ILA GUDBOONAA HADDAAN,
BXBB GORLAMAYE KUWII AAN DHALOW,
GODKA IIGU KAALAYA CIYOON,

GOOR BADH TEGEY LEYLKA.
IGA GARIIRSIIYEY.
MAQANNA GAADHSIIYA.
GOLOLKI DHEERAAYE.
GAWRECEEN NIMANE.
GEESIGII CUMARE.
GAABAN BAA WADAYE.
GOOXI UU DHALAYE.
GOONI KU AHAAYE.
DUNIDA GUUDKEEDE.
GARABKA HOOSTIISA
GEED SIBAAN AHAY DHE
GUDUBSI II JIIDHO.
LA IGA GAADHSIIYO.
GEERI LOO DHALAYE.
WAA GAMI LAHAAYE.
HORE U GOOYEENE.
GOBOL GUSKAYGIIYE.
GACAL HA WAAYEENE.
GAABATOO DHACAYSO.
GUUD CADE ANWAAYO.
GOOHE IYO YUUSUF.
GUDURKA LAYN WAAYIN.
HAAD KU GAMASLAYNIN.
IIL LASOO GELININ.
GEERI IGU RAACA.
GOOHE IYO NUUR DHE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY

GOOX CUMAR WUXUUNA YIDHI;

GABANYOHOW GADAAL BAAD U NOQON,
GURYIHII HADDII AAD TAGTIYO,
GUULOW ILLAAHAY HADDUU NABAD,
GODKII AABAHAY UU KU JIREY,
FARIINTANA U GEE INA ADEER,
MA GOBLAMINE AABOW WARKII,
GEES IGAMA DHAAFINE QALBIGA,
GARAWSADAY GAR LAMA DIIDI KARO,
GAAJIYO HARRAAD IYO ABAAR,
GEYI OMOSA MAAL GAABTAY IYO,
GOORTOO CIDHIIDHIYA MARTIDA,
GOBI BEEQDA WAA BIXIN JIRTIYO,
ABNA GACANTA WAA KUGU OGAAYE,
GADH MADOOBAYAAL KULA DA'IYO,
IYO GUURTI AAD WADA TIQIIN,
OO GOOMAN BAA KUUGU IMAN,
GALABTAY KASOO DHEELMAYAAN,
GOGOL SII DHIG ODAYAASHU YEY ,
GAMCAHAY KU BOOBSIIN SALAAN,
GAADIID QASHAA IYO IRMAAN ,
WIXII KULA GUDBOON YEEL,
GAAD USII HILBAHA YEY KU ODHAN,
GUDURKIYO BARUURTABA UGEE,
GOORTAY DHERGAAN NIMANKU ,
KA GUR HADALKA INAN WAAJIBKII,

GOLABTA SHAALEEYE.
GARAB RAGGII YIILEY.
KU GAADHSIIYO.
GACALAHAYOW TAG.
OO HAKALA GAABIN.
XALAY ISOO GAADH DHE.
YUU KU GAW YIDHI DHE.
ODAY GUDDOONKIIS DHE.
LA ISKU GAWDIIDSHEY.
GUUYO LE'ANAYSA.
SOO GAB TIDHI REERKA.
SOORYADII GOLE'E.
HAATANA HA GOYN DHE.
GUUD CADIYO WIILBA.
GEBI AHAANTOODA.
GOOR CAWEYSINAHE.
GURI SANKOODIIYE.
KAA WARXUMO GEYNE.
AAN GUN KA AHAYNE.
HANAQA GOYSAABA.
ADAA XEELADDAA GARANE.
GOOR DANBUU QALAYE.
HA ISKU GOOSTEENE.
WAY KUU GED BAXAYAANE.
SOO GUTAAD GARANNE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CAWEB FAARAX OO KULA TALINAYEY

SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN DABADEEDNA

WUXU YIGHI;

SA'DA GABAYGA WAATAAN BERYAHAN, SAAHID KA AHAAYE.
SABAANADABA WAA IGA MAQNAA, SIINKA MAANSADUYE.
MA SAMAYNIN WAATAAN TIXAA, SOOHI JIREY WAAYE.
SAQDII DHEXE ALEYLKII XALAA, HAATUF II SIDAYE.
AN SIFNEEYO CAAWANA MIDKAY, SAHATAY LAABTAYDU.
SIDIISABA HADDII DIINTA RUUX, SAAKIN KU AHAADO.
AMA UU SI DAACADA SHARCIGA, SARE U QAADAAYO.
SAKHIRAAD ILLAAH IYO KALGACAL, ANIGA LAY SAARYE.
SUURADAADA ANIGOON OQOON, SAWRICIYO JIIDHKA.
SADDEXDII WALLAAHOOD MA JIRIN, NIMAN KU SIISTAAYE.
HAYEESHEE SALUUG BAA IGALAY, SANIYO DHEERAADE.
SAWD YAR IGA MAQAL WAA INAAN, SABABTA SHEEGAAYE.
SOKEEYIYO XIGAALIYO TOL IYO, SEEDI XIDIDKAAYA.
SAXARIIRNA AAN KULA JECLAYN, INAD SILOONAATO.
SAMAHAAGA RUUX DOONAYIYO , SAAJAC NIMADAADA.
SACAL IYO MARBAAD CADHO QABTAA, AANOD SAX AHAYNE.
HAL KU SEEGAY RUUX SUGAYA OO, SAAFIYAA JIRA'E.
SAXAR HADDUU INDHAHA KAAGA DHACO, SIIGO KUGU DUUSHAY.
RAGAAN SEEXAN KARIN BAA JIROO, KULA AH SAAXIBE.
SAYID MAXAMEDOW TALO WAXBAA, LA ISKA SIIYAAYE.
SOOMAALI LAYNTEED WANAAG , KUUMA SOO SIDO'E.
SIDAN DOORI SAHAL YUU RA'YIGU, KAA SIBIIBIXANNE.
SADAR KULA QALOOCANI MARBUU, SAANI KUU YAHAYE.
SUUBANE RASUULKIIBA SHAWR, WAA SAMAYN JIRAYE.
SIDAAN MAQALAY DHAWR GOOR RAG KALE, TOODA SOCODSIIYE.
SAYID MAXAMEDOW TALO WAXBAA LA ISKA , SIIYAAYE.
SOOMAALI LAYNTEED WANAAG, KUUMA SOO SIDO'E.
SIDAN DOORI SAHAL YUU RA'YIGU, KAA SIBIIBAXANNE.
SALAB IYO HADDII AY HAYAAN, SUMUCA MAADHIINKA.
SIDAADAA RAG BADAN BAA U NECEB, GAALKA SAYNTA LEHE.
SUBAX KELIYA OO WAA BERYANA , SAGAL LA'AADEENE.
SAYID MAXAMEDOW TALO WAXBAA, LA ISKA SIIYAAYE.
SOOMAALI LAYNTEED WANAAG, KUUMA SOO SIDO'E.
SIDAN DOORI SAHAL YUU RA'YIGU , KAA SIBIIBIXANNE.
SIDIIQAAGA KAA MAQANI WAA, SIDATAN CIIDDAASE.
WAX BADAN OO KU SAACIDA KHALQIGA, YEYDIN SABABTEENE.
KII KULA SAFNAA IYO HADDAY, KUU SINMAAN CADOWGU.
OO AANAD KALA SOOCIN WAA, SAYMO IYO HOOGE.
SAYID MAXAMEDOW TALO WAXBAA, LA ISKA SIIYAAYE.
SOOMAALI LAYNTEED WANAAG, KUUMA SOO SIDO'E.
SIDAN DOORI SAHAL YUU RA'YIGU, KAA SIBIIBIXANNE.
SINBIRIIRIXAY KULA RABAAN, SIN AD U DUUSHAAYE.
SULDAARADA RAG KULA DOONAYANA, WAAD LA SOCOTAAYE.
SEEF INAN RAG KUMA SOO HOGTIYO, SAANAD IYO XOOGE.
SAYID MAXAMEDOW TALO WAXBAA, LA ISKA SIIYAAYE.
SOOMAALI LAYNTEED WANAAG, KUUMA SOO SIDO'E.
SIDAN DOORI SAHAL YUU RA'YIGU, KAA SIBIIBIXANNE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN XXX WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN
OO UGU JAWAABEY CAWEE FAARAX DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

SA'DA MAANSO SUUGAANTA GABAY, SADARKA GEERAARKA.
SIDRIGA IYO LAABTAAN KA JARAY, TAN IYO SOONKIIYE.
SALAADIYO CIBAADADA RABAAN, SAXAYEY MAANDHOWE.
SUURADO QURAAN IYO WERDIGA, XXXXXXXXX SAACADAHA LEYLKA.
SUJUUDIYO RAKOOCDAAN INTAA, SAAKIN KU AHAAYE.
SIDAASAAN U RAAJOO JAWAAB, KUUMA SOO CELINNE.
SAXARKIYO MIDKII AAN KA TIRAY, SIIGADIYO BOODHKA.
OO SAAFIYAAN CUDUR LAHAYN, CEEBNA LAGA SAARAY.
WAA SAMAY LA MOODYOW MIDAAN, QORAY SIDAYDIIYE.
SAMA WADAHA INA FAARAXOW, IGA GUDOON SAAKA.
CAWEDOW MID SAAXIIBKAYAAD, SAWDKI LEEDAHAYE.
SAXNA WEEYE WAANADA INAYNU, ISA SIINAAYE.
HAYEESHEE SULDAARO IYO QONOF, SAAYIDAA JIRA'E.
SIRTA HOOSE MAAD DHUGAN NAFLUHU, WAXAY SAMEEYAANE.
NIN GARDARAN SIDDIISII CANAAN, SOOCAN BAY TIMIYE.
ANNA SI AY U JEEDDABA MA QIRIN, WAXAD ISAARTEENE.
HADDAAN SAHAN LA DIRIN REERKU, WAA SOCOD HABAABAAYE.
SIBIIBIXASHO KEEN HADALKA KII, LOO DHAHAA SAHALE.
SII AXADHKU WAA FIICANYAHAY, XAAJO SUGIDEEDE.
SAFKAYAGAN JAHAADKIYO KU JIRA, XAQA SAFAYN-TIISA.
SENGAA SEEFTA LALA SAARAN YAHAY, WARANKA SEERAARAY.
SUMUCAAN RIDEYNIYO HADDAAD SAANADDII, ARABTAY.
SABABTA KEENTAY INAD FIIRISAAD, SEEGTAY TALADIIYE.
HADDAAD HADALKA SUURADIN LAHAYD, KULAMA SIIBTEENE.
SINJI KA HADLI MAYNO'E WAXAA , LAGU SOCDAA DIINE.
MAR HADDUU SALAADIYO KA TAGO, WAAJIBADA SAARAN.
OO AANU SOON GUDANIN WAA , SAYMO LAGU OODYE.
SAAN CADDAHA KUFRIGA KAMA DUWANA, EYDA SAYNTA LEHE.
SOOMAALI GAALIYO IYAGU WAA, RAG II SIMANE.
SAFAAD MALAHA DIINTUYE HADDAAN, SUURADAHA EEGNO.
SAQIIR IYO KABIIR INAN DILAA, WAA XALAAL SUGANE.
ADNA YEY KU SIRIN WAXA U SEDA, NAARTI OO SUGIYE.

WAA DHANYAHAY.

XXXXX MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY DHAAYE QOLOF MAR DARAAWIISHTII QABATAY ISAGOO AAY CIDLA AH MARAYA OO AWR KA LUNTAY DOONAYA, MARKAASAY KU YIDHAAHDEE ASHAHAADO OO DARDAARAN WAANU KU DILEYNAAYE. MARKAASUU MAANSADAN HOOS KU QORAN TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

ADOO IYO WAQAAD HOOYO IYO, EHELBA WEYDAA DHE.
INAADEER RUMAAD IYO WAQAAD, TOL ARKI WEYDAADHE.
UBAD AAD DHASHAA KUMA ANFACO, AABE KAAD TIDHI DHE.
OORYAHA WAQAANAD UGALMOON, EEGGE DABADEED DHE.
ABTI WAA AWOW IYO AYEY AAD, QOF KUU JECEL DHE.
AKHTARKAAGA GOO MIDU ILLAAH, KUGU IRDHEEYAA DHE.
ILKUHU KAA QUBTOO WAQAD INDHAHA, ARAG KA WEYDAA DHE.
OOFAHA WAQUU KAAGA DHACO, WARAN AFAYSNAA DHE.
KU ABBAARYEY CUDUR AADANUU, KAA AG CARARAAN DHE.
UUMIYUU DHAMAAN KULA COLOW, KAAD IS ARAGTAAN DHE.
ANFACAAD CUNTAA WAQU SUN MAWD, KUGU AHAADAA DHE.
UURKIYO KA BARAR OOGADOO, ADHAX KA NAAFOW DHE.
ADDIMADA KA BURUR OO WAQAA, OROD HA DHEERAYN DHE.
INDHA GARAD KAWAA DUNIDA IYO , RUUX OQOONINA DHE.
ISLAAMNIMO ILLAAH KUGUMA DILO, KAAFIRNA AHAW DHE.
AAKHIRO ILLAAHAY JANADA , KAA ADKEE ADI DHE.
AWOODEYDU SIDAY MAANTA TAHAY, TAADUNA AHAATAY.
IBLEYS MEESHA UU GALO , WAQAA SAAKIN KU AHAW DHE.
OLOLKEEDA NAARTIYO CADAAB, KUU ASAL AHAA DHE.

MAANSADAA INTUU TIRIYEY AYUU YIDHI HADDABA SIDAAD DOONTAAN YEELA. MARKAASAY NOLOL KU KEXEEYEEN, OO UGEEYEEN SAYIDKII. MARKAA WUXUU YIDHI BAL TIRI GABAYGII AAD DARAAWIISHTU MARKAY KU QABATAY AAD TIRISAY. MARKAASUU MAANSADII UTIRIYEY.

MARKII UU MAANSADII U TIRIYEY AYUU XXXXX SAYIDKII KU YIDHI MAANA COLKA KU QABTAY KUU SOO DIRAY OO KU IDHI DHAAYE SOO QABTA, MISE DADKAAN ANIGU KAA IQIIN MAXAAD ANIGA IGU MAAGTAY MAAD NIMANKA KU YIDHI WAA KU DILEYNAA , HABAARTID.

MARKAASUU TIRIYEY MAANSO KALE OO UU KAGA QANCINAYO HABAARKII UU SAYIDKA HABAARAY. MAANSADIINA WAATAN KU QORAN BOGGA SOO SOCDA. EE KONTONAAB.

DHAAYE QOLOF BAA TIRIYEY MAANSADAN OO M WAA MAANSADUU
UGU JAWAABEY SAYID MAXAMED MARKUU YIDHI MAXAAD IGU MAAGTAY
DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

OMOS IYO HARRAAD MEEL LE ,
ANOO MARAYA AY LAGA QAXAAN,
ASQO IYO ANOO GAAJO QABA,
ISLAAM GAALO DOONAAYEY AAD,
IGA HELE DHULKII AWDANAA,
WAA NIMAN AWOOD SHEEGTAY,
ASHAHAADO LAY YIDHI DHAKHSAAN,
ARGAGAX IYO GOORTAY NAXDINI,
ODHAAHDIISA AABOW SAYIDI KII OG,
ISMA ODHAN ADDOONKII DHINTAA,
ISMA ODHANIN AAKHIRO NIN TEGEY,
ISMA ODHAN ARSAAQ KUU HADHIYO,
ISMA ODHAN DARWIISH OOMAN BAA,
INTAY ILA AHAYD NOX NOLOLI INAY ,
ARGAGAX IYO GOORTAY NAXDINI ,
ODHAAHDIISA AABOW SAYIDI,
ANIGUBA AFXUMO KUMA HADLEEN,
ISMA ODHAN DIBBAAD ULA KULMIYO,
ISMA ODHANIN AQALKIISI BAAD,KHXXRKIXBBBNXXXXEX
ISMA ODHAN ANFACUU LEEYAHAAD,
ISMA ODHAN AWAADHAADI BAAD,
ARGAGAX IYO GOORTAY NAXDINI ,
ODHAAHDIISA AABOW SAYIDI,
ISMA ODHANIN EED IYO HA GELIN,
ISMA ODHAN ILLAAH BAA WAX DILA,
ISMA ODHAN AYAAMAA CIMRIGA,
ARGAGAX IYO GOORTAY NAXDINI,
ODHAAHDIISA AABOW SAYIDI,
IMINKANA ILLAAH SIDU GARTAAN,
ADIGANA AFKAAGAAN KA SUGI,

OO DHAB U ABAAROWDEY.
UUMIYUHU OOLIN.
OOMATINA WAAYEY.
SOO DIRTEEN IDINKU.
GOOR HADHKI AHAYDE.
OO IGA ITAAL ROONE.
KUU AJALAYNAAYE.
IGA GARIIRSIISAY.
MA AHAYNE.
IIL KASOO BAXA'E
YAA IFKA IMAANNE.
OON DANBAAD CUNIYE.
KUU XX AXSAAN FALIYE.
IIGU EEGTAHAYE.
IGA GARIIRSIISAY.
KII OG MA AHAYNE.
EDEBLA'AANEEDE.
WAA ADDUUN WUXUYE.
KU ARKI DOONTAAYE.
KU AG CUNAYSAAYE.
U AKHRIYEYSAAYE.
IGA GARIIRSIISAY.
KII OG MA AHAYNE.
AADMI GODOBTIISE.
AMARNA WAA KIISE.
EEGA KUU HADHAYE.
IGA GARIIRSIISAY.
KII OG MA AHAYNE.
RAALI KU AHAANE.
WAASE AMARKIISE.

WAXAA LA SHEEGAY MARKII UU MAANSADAA TIRIYEY

DHAAYE INUU SAYIDKII MUDO BADAN HAYEY DABADEEDNA UU YIDHI
MAKA MID NOQONAYSAA DARAAWIISHTA OO REERKAAGII IYO WIXII
KAA TALA QAATABA MASOO RARAYSAA ? WAXAA LA YIDHI DHAAYE WUXUU
YIDHI MAYA !!! MARKAASUU SAYIDKII XOOLO SIIYEY RAGNA KU
DARAY GAADHSIIYA CIDDIISII.

MAANSABAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI

WUXXUNA YIGHI,

CODKA GABAY BERYAHAN WAANIGII, CAAJISKA AHAAYE.
CINDIGEYGA WAATAAN KA JARAY , CAMALADIISIIYE.
IDHOWEYDAA WAATAANAN CURIN, WAANA CAASIYAYE.
CISHADII AN JOOJABA DAR BAY, GU CESHA NUUROWE.
SIDII SHEEKH CIMLIGA DAALACDOO, CAALIM KU AHAADAY.
KOL HADDAAN CAWEYSKII QABSADO, WAAN CADDAYN JIRAYE.
CAYNKA BAL AN KA DAYO WAANIGII , CAARIF KU AHAAYE.
NIN CIROOBEY WAAYEEL CIMRIYEY, GUUDKA KA CADDAADAY.
INTAANU CUNAHA SOO DHAAFIN UU , JIRO CALOOSHIISA.
CODKAR NIN IHI HADALKIISA , WAA INU CASHUURAAYE.
UU CEEB MIDKII KEENAYIYO, CAALIDH KA RABAAYE.
CABSAA MALAHAY KAA KEENEYSIYO, CIIRSI GACAL WAAYE.
CABBANAANTU WAA INA MIROW , CAADADII FULE'E.
NIN HADDII U CAYTAMO AFKUU , CIIDAN BIDAYAAYE.
WAA CAAL-LA'AAN WAXAD DEBNAHA, U CUSKANAYSAAYE.
RAG COLOOBEY WAA INU DAGAAL, KALA CAD GOOSTAAYE.
CUDUDIISA WAA INU NIN RAGI, KAGA BAXAA CIILE.
CISIBAA LAGA HELAA CAAFIMAAD, CUDUR LA'AANEEDE.
CADDAAN WAA IN LAYSULA DHACAA, CAARA DHUUB KULULE.
CILAAN OLOLEYSIYO DAAWAD IYO, CAAWIN SIDIGTEEDA.
CASAR BAA LAGAA SOO MELMELEY, CUURNA LAGU LAAYE.
CALI IYO WATAA FAARAX IYO, KU CAYILEEN DHUUXE.
IDINA CAYDH DARTEED WEYDINKAA, CEESH YABOOHSADAYE.
COL HADDAANU IGU SOO BAXAYN, CIIDANNA AD WEYDEY.
MAXAY CAYI KUU QABAN HADDII, CULUS LAGAA QAADAY.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADANNA WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI

WUXUUNA U TIRIYEY ISMAACIIL

MIRE WUXUUNA YIDHI;

QOSOL BAA HAWEEN LAGU RINSHAA,
GOOR QABOOBE AHE.

QAMUUNYEY DABEED KU UMULAAN,
QOOMAMIYO CIILE.

QADDER BIL IYO MAALMO AH AYEY,
QAXAR ILAAWAANE.

IYAGAA WIXII SOO QABSADAY,
QAAFIL KA AHAANE.

ADNA QAABADDAASAAD TEHEE,
WAANAD QIRANAYNE.

LABADEENA QOLO MAALINTAY,
QIRA HESHIIN WEYDEY.

QABKA IYO MARKII AAD HAWADA,
QOORTA KOR U TAAGTEY.

QALOOCA IYO MAAGIYO MARKAAD,
QOOQA DAMIN WEYDEY.

QUNYAR SOCO MARKII UUMIYUHU ,
KAALA WADA QUUSTAY.

QUWAD BEENA NABADDII MARKAY,
KULA QUDHMUUNAATAY.

QALALAASIHII DHACAY MARKAY,
QAYLO KOR U YEEDHAY.

HUBKA KII QARSOONAA MARKII,XXX
LA ISU SOO QAATAY.

QOORTII BANAANAYD MARKAY QARAXDAY,
BAARUUDU.

EE LAYSKU QAABILAY DAGAAL KULA,
QADHAADHAAYE.

QIYAASLI'I MARKII REER TOLKAA,
MAYDKU QUBANAAYEY.

QORAXDOO KULAYL BADAN MARKUU,
QIIQU KOR U DUULAY.

IN QIYAAMIHII DHACAY MARKOW,
QAADATEEN IDINKU.

QOOFKA IDIN GALAY MAALINTAAD,
DAADISEEN QALABKA.

RAGGAAD QUUDHSANEYSEEN MARKII,
AAD U QUMI WEYDEY.

QAAN BK GAADH ILAAWAA MAJIRO,
MAALIN QARA WEYNE.

QALBIGAA KU DOORSOOMAY IYO,
QODOBADIISIIYE.

QUDHA INAMADII LAGA JARIYO,
QAAFADII LE'ATAY.

QADHADHEYTIDII SHALAY GO'DEE,
AAD QABRIGA GEYSEY.

QAALIGA RAGGIINII AHAA,
QALANJIDII AAWAY.

QOSOL BAA HAEEN LAGU RINSHAA ,
GOOR QABOOBE AHE.

QAMUUNYEY DABEED KU UMULAAN,
QOOMAMIYO CIILE.

QADDER BIL IYO MAALMA AH AYEY,
QAXAR ILAAWAANE.

IYAGAA WIXII SOO QABSADAY,
QAAFIL KA AHAANNE.

ADNA QAABADDAASAAD TAHAYE,
WAANAD QIRANAYNE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CABDI

WUXUUNA YIDHI;

CABFIMAAD ADOO QABA HADDUU,
CUDUR KU SAAMEEYO
CAAWOOYIN DHAWRIYO HADDUU BILO,
KU CAANSIIRSHO.
CASAR HADDII U KAA QAADO WOW ,
FUDUDYEHEE CAADIL.
OO CAATO IYO TAAG DARAAN,
AAD KA CABANAYSO.
CALOOSHAADA GELI NIMU DILAA,
CIIDDA HOOS MARA'E.
CARUUR BADAN HADDII AAD DHASHOO,
MAWDKU QAAR CELIYO.
BEER WAA CAJAAYIBE HADDII JIIDHKU,
CADANYOODO.
CALOOSHAADA GELI QAAR CIRA LE,
YAAN WOQOOD CURANNE.
CID MID ADIGA KUU XIGEY HADDUU,
CAAL UKALA WAAYO.
ADNA CUUDKU UU KUGU YARYAHAY,
AAD KA CABANAYSO.
CALOOSHAADA GELI QAAR KHALQIGA,
CAYDHA BAA JIRA'E.
CIR MAR DA'AY HADDII AAD XAREED,
MAALMO KA CABEYSO.
OO AANAD CIIR DHAMIN BERYANA MAALKU,
DOOG CUNAYEY.
CARABAAN LAHAYN BAAD HADDII,
AY DHIRTU CADDAATO.
CAWSLI'IDA JIILAAL HADDII AAD ,
KA CABANAYSO.
QAARBAA WIYEERKII CABOO ,
CEELASHII TUBANE.
CALOOSHAADA GELI NIMAN ABAAR,
CIIRSAN BAA JIRA'E.
CEESHKII LAGUU QORAY AYAAD,
CALAFSANEYSAAYE.
DAD WAXAY CANTUUGEEN HADDAAD,
XXX QAYB KA CUNIWEYDO.
LAYSKUMA CANAANTOO RAGOW,
WAA CILMI ILLAAHE.
HADDAAD CAABUD TAHAY AAD ILLAAH,
KA CABSATOO RAACDO.
UU KUGU CIDHIIDHYOO RISIQA ,
CAASIGOW BADIYO.
LAYSKUMA CANAANTOO RAGOW ,
WAA CILMI ILLAAHE.
CULIMADU SIDAY INA FAREEN,
CAARIFYADA DIINTU.
CODSASHADA ILLAAH IYO BARYADU,
CEEB MA AY AHA'E.
RABBI NIN U CABHOOBAA MA HELO,
CIS IYO MAAMUUSE.
YAAN SAMIRKA LAGA CAAJISINE,
SOO CUSKADA EEBBE.

WAA DHAN YAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI
WUXUUNA U TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE
XASAN WUNA YIDHI;

IRDAA GABAY MARKII AAN U XIDHO,
AAN AAMUSAABAAN ARKAA AABI,
NIN ASLUUB XUN WAA LAGA QABTAA,
MARKAASAAN ABUURAA MIDAY EDEB ,
IMANKANA MID BAAN SOO UNKAYEY,
IGA GEEYA WAATAAN BERYAHAN ,
ABEESADUBA DHUL U EEKIDAY,
OOGADA SAREETIYO JIDHKUU ,
AADANAHA WUU SHAABAHAA ,
ISLAAM BAA KHALQIGU MOODAYAA,
INSI MAAHA SHAYDAANKU WAA RUUXAN,
ASXAABTII FIRCOON BUU KA HADHAY,
ASHAMAADDA GOORTUU QIREE UU ,
AWLIYO LA MOOD SHAWSE WAA ,
ABTAA INANKA LOO YAHAY WAXAA,
IXTIRAAMKA XIDID BAA HARTIGU,
GOORTII AROOS LOO SHARAXO,
EE AADDAN GABADHOO NIN DHALAY,
ADDUUN GEELA GOORTII LO'IYO,
ADDOON WALIBA GOORTUU DHERGUU,
OGAADEENKA WAA KAA NOQDEE,
UGAAS IYO MA UU DHAAFIN ODAY,
IDILKII HARTIGA SOW AF XUMO,
ABTIRSIINYO FICIL MAXAMED,

AMASE AAN DAAYO.
QAAR WADA'E
UUMIYAA KALE'E.
KU QAATAANE.
IGU IGBAAREENE.
GAAX SANAAN JIRAYE.
KUGU IDLAYSAAYE.
NOOGA EEGYAHAYE.
WAANUSE AHAYNE.
WAA IBLEYS KANIYE.
LA OQQONE.
ODAYADOODIIYE.
ADDIMAY WAAYO.
EHEL CADAABEEDE.
KEENTAY INANTAYDA.
WELIGI EEDAAYE.
AQALNA LOO GOODO.
LOOGA DHIGO OORI.
ADHIBA LOO BUUXSHO.
KU ADYADOODAAYE.
SHEEGTAY MEEL ADAGE.
AMA IKHYAARTIIYE.
KUMA EKAYN MAANTA.
SOW EEDDA UMA GEYSAN.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CABDI

WUXUUNA YIDHI;

IN DHOWEYD BA'DII GABAY KA TEGEY,
INA BULAALOWE.

BEDENKAYGA WAATAAN KA JARAY,
BAABKI MAANBADA'E.

AN BAYIMIYO WAATAAD MURTIDA,
IIGA BARATEENE.

BAALAHA HADDUU ADHI KA GO'O,
UU BAXSADO GOOSAN.

OO BAHAL CIDLADA UU KA HELO,
BAAHI QABEY WAAYO.

BARUUTA IYO JIIDHKABA KA DHEREG,
BADINA LAA SHOWE.

BAADI DOON WAXAY TII LAHAYD,
AAD U BALASLAYSO.

WAXAY BAAFISABA WAA RAQDII,
INAY KA BOYDAAYE.

HADDII AANAY BAYLIHIN KOL HORE,
BA'U MA HAYSTEENE.

QABIIL BADAN HADDANA KALA BADHTAMAY,
BEELO KALA GUUREY.

BAH COLOWDEY GUURTIDU HADDAY ,
KALA BOGSIIN WEYDO.

BAARUUD LA KAYDSADAY HUBKII,
CADOWGA LOO BIIRSHEY.

BIRTII LAYSU LOOSHADAY HADDII,
LA ISKU BAALBAALO.

OO BAASHAYAAL LAYSKA DILO,
LAYSNA BIXIN WAAYO.

BURUUDKII KA DUUL AY KHALQIGU,
KAGA BAQAAYEENE.

U BALAME SHISHEEYUHU KOLKUU,
BAAWARKOOD JABO'E.

BAAQIGA KA HADHA BAA TOL YARI,
BILILIQAYSTAAYE.

BARI IYO GALBEED UUMIYAHA ,
GEES KASTABA BUUXA.

BILI AADAN WEYDIIN COL KAAD,
BERI IS JIIDHEENE.

BUKAAN BAA KU JIREY WAAYADEER,
JAAMAC BADIDIISE.

BAARAAN DEG BAA LAGU HELAA,
XAAJADII BA'NE.

LAFTA BURURTA WAA LAGA GURAA,
BIIXIYAA JABANE.

BELEL BAA KU XIGA MEEL HADDII,
QIIQ KASOO BAXO'E.

BUG INTAANU ODHAN OLOLKU WAA,
INAD BAKHTIISAANE.

BELAAYADA HADDAAN LAGA HOR TEGIN,
BILOW MARKAY JOOGTO.

LAMA BAACIN KARO GOORTI AY,
BAAHDO WELIGEEDE.

BA'OO BA'E CALIYOW INTAAN ,
HAADKU INA BOOBIN.

MAA CUDURKA BAADHAAN RAG WAA,
BOOGTA KII DHAYA'E.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY MAXAMUUD CALI BEENALEY

WUXUUNA YIDHI

DHEER DHEERTA GABAY YUUSUFOW,
WAANIGII DHIGAYE

DHOWAANAHABA UMA HAAL LAHAYN,
DHEESHA MAANSADA°E

WAATAAN KA DHAWRSADAY INAAN [illegible]
DHUDA DHUDEEYAAYE.

DHAMAAS NIMADA WAXA IIGU WACAN,
AAN LA DHEGA BEELAY

WAXAY DHIBAY DHAFOOKIYO WARKII,
DHUUNTA II GALAYE

MAANTAY BAHDAA DHIMATO WAAD,
DHOGOR XUMAATAAYE.

DHUKAANKII HADDUU IGA BAXAAN,
DHOOB DILAACSADAYE

DHIRIF IYO WAXAAN CADHO QABOO,
DEBINTA DHAADHYAABA

KUWA DHAMAYA CAANAHA WAXAAN,
DHAB U JALEECAABA.

GUNBAA KALA DHAQAAQDEE WAXAAN,
DHIDIBKA AASAABA

DHIBA WIILASHII JIREY WAXAAN,
UGA DHAWAAQAABA

DHALIIN YARADU SUUQYABA WAXAY,
DHADAB DHATAYSAABA

WAXAAN GOOLAL DHUUNTA U JAROY,
DHEEGA KA CABBAAN BA

DHALAANKA IYO NAAGUHU WAXAY,
DHIBI LAHAADAANBA

WAXAAN TIMAHA DHOORKOOBA SARE,
DHUUXA MARI YAABA

DHIIGLEYDA WAXAN IIBSADOO,
QAMARTA DHAANSHAABA

DHOOLEY KUWII HELAY WAXAAN DHAB U ,
ILAAQDAABA

DHISINKAAN RUQSADAY REER HAWAAS,
DHABARKU MAW NAAFTAY

MAKA DHACAY DHALTIDA GEELA WAY,
DHARAQSANAAYEENE

DHAXANTIYO DABAYLUHU MA MARI,
XERADI DHOOCAARTEY

DHIRBAAXADA XIGTANA QAAWANAAN BAAN,
DHAWRA LEEYAHAYE

KUU DHALAY DHAFOORKIYO KOLKII,
DHAADKA LAGA TOOGTEY

QARBUB BEYNA DHIILABA KA GELIN,
OLOLKI DHEERAAKE

MIYUU DHUUNTAY AW JAAMAC MUU ,
DHICIYO GEELIISA

DHABAA ADARI DHOOF IYO JIGJIGA,
DHINACA OODWEYNE

ADOO DHIIQALYEYNAHAYA AAN,
NIRIG LAGUU DHAAFIN

DHALEECAA KU RAACDAYE HADDABA,
WADO DHANBAALKAAGA.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULE XASAN

OO KAGA JAWAABAYEY GABAY CILMI CARAB WUXUUNA YIDHI;

DAM HABEEN MADOW IYO DAYUXU, WAA IS DABA JOOGE.

DIRAAC GOOD ABAARA IYO ROOB, WAA IS DABA JOOGE.

DADKA RUUX DHASHIYO MAWDKA DILI, WAA IS DABA JOOGE.

DURDUR LAGA CABBAAYO IYO OON, WAA IS DABA JOOGE.

DIIHAALKA GAAJO IYO DHEREG, WAA IS DABA JOOGE.

DIRIR LAGU IDLAADIYO HESHIIS, WAA IS DABA JOOGE.

DULI CUDURA IYO CAAFIMAAD, WAA ISDABA JOOGE.

DIIRDIIRIMAAD IYO JILEEC, WAA IS DABA JOOGE.

DIIDMADA NACAYBKIYO KALGACAL, WAA IS DABA JOOGE.

DAMAANSHAAD CAYAARA IYO CIIL, WAA IS DABA JOOGE.

WAA DOORBA DOOR DUNIDU OO, WAA IS DABA JOOGE.

OO DUULBA JEER BAA NABSIGU, YARE DALEENSHAAYE.

WAXSE DEREJO AAKHIRO LAHAAN, MUUMIN DAACADA'E.

KOL HADDII DARAAWIISH LA JARAY, CIIDAMADI DIINTA.

DAGAAL YAHANADII IYO HADDAAN, DIRICYADII WAAYEY.

AY DANABADII IGA MADHEEN, DOQONKU YEELKIIYE.

DOOROONAYAASHII HADDII LAGU , DUL GEERAARAY.

OO AAN DALKII IYO KA TEGEY, DAARO IYO MAALBA.

CILMOW DIGASHO WAA FILAYEY IYO, CADOW DURBAANKIISE.

HAYEESHEE DIB WAXA AY KA NOQON, DAAYIMKAA GARANNE.

SIDII DAAWAD AWR LAGU DAROO, QOOQ LA DUBAYOOBEY.

DOOFAARADII GAALKA WADEY , HA IGU DOOBYEENE.

ADNA SIDA DAMEERAHA DHERGAAD, SOO DANAANIDAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULE XASAN
WUXUUNA KAGA JAWAABEY GABAYGII CILMI CARAB U DIRAY
MAKA WUXUUNA YIDHI;

HADDII AXAD DULMIYEY BUMIYAHA ,
OO AAD AWOOD WEYDO WAA,
HAYEESHEE ILLAAH BAA BARYADA ,
ISAGAY AHAAN SIDU RABOO NAGA,
AADMIGA WAXAAD KA CODSATAA,
U ERGOOTEY ARADKII MAKIYO,
HADDII AY U GEEYAAN WARKAAD,
AWLIYADA QAARKOOD HADDAAD ,
NIN ISLAAMKA CAASIYEY MA JIRO,
AFLAGAADADII AAD DIRTIYO,
IKHYAARTAY UTEGEYSAANA WAA,
AMBAD BAA TEHEE MAAHA GAAL,
IYAGUBA KUFRIGA KAY ARKAAN,
ASHAHAAD NIN DIIDIYO ILLAAH,
ADIGUNA KUWAY AAYIRAAN ,
AFKAAD KU HADLAYSAA BAY KA GARAN,
ASLUUB XUMADA WAA LAGU YAQAAN,
IBLEYS WAA YAQAANAA NINKII,
ODHAAHDAAD DIRTIYO WAXAY KA GARAN,
MEESHIYO ASXAABTIIBA WAYS,
ANBAD BAA TEHEE MAAHA GAAL,
EGMATAA RAG KALE IYO CILMOW ,
AFAAD ULA TAGTABA INU AQBALO,

LAGA ADKAANWAAYO.
LA ASHTAKOODAAYE.
LAGU ABAARAAYE.
ITAAL ROONE.
AAYATIIN MALEHE.
ODAYADIISIIYE.
EBIDEY LAY SHEEGYE.
U ANDACOONEYSO.
SHEEKH AQBALAYAAYE.
MAQALAY EEDDIIYE.
MUUMINKI ADKAAYE.
EHELADIISIIYE.
WAA AJALAYAANE.
WAA COL ABIDKOODE.
WAAD U EEGTAHAYE.
GAAL INAAD TAHAYE.
EHELKA NAAREEDE.
EEBBE AAMMINAYE.
EREYADAADIIYE.
ARAG NECBAAYEENE.
EHELADIISIIYE.
ADIGU AADDAABA.
TAA HA EEGINA'E.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CALI DHUUX AADAN
WUXUUNA U TIRIYEY , SAYID MAXAMED CABDULLE
XASAN WUXUUNA YIDHI;

ARBOW YUUSUF IYO JAAMAC IYO,
ABTIYAALADAA IYO KU NECE,
ABTIRSIINYADOODII HORAY,
WAA KUWAA AWAARAHA KU DHIGAY,
WAXAAN UUBATEEYABA TOLKAY,
ADHLAXYOHOW RAGGAAD KU AMRANAYD,
ASHAMAADEY GAALKUBASE WAA,
ALLAAHU AKBAR EEDAANKU WAA,
HADDUU UURKA KAA JIRO WERDIGU,
HAKU OLOLIN MAAD IHIB ILAYN,
ABTIRSIINYADAA WAXAY GASHAA,
NAGA AAMO AAKHIRO ILLAAH,

OOGLE KAA TAGE'E.
URURTI REER KHAYRE.
UURKA KU HAYAANE.
AGAB LA'AANEEDE.
OODDA SOO JEBIYE.
ADIGA MAAHAYNE.
EHELU NAARKIIYE.
KAA AFKIYO BEENE.
KAAMA ORODNEENE.
AWRTA HAASHIMAHE.
EYDA REER XAMARE.
KUU ARXAMI WAAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CALI DHUUX AADAN

WUXUUNA U TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE

XASAN XX WUXUUNA YIDHI;

NINKII WELIGI DIINTII BANAAN,
DAACAD UGU SHEEGA.

DARIIQII RASUULKII NINKII ,
DIIRKA UGA QAADA.

DAW KULAMA SOO BAXO CILMIYE,
WAALA DIRIRAAYE.

DOOFAARADUU WADAN JIRUU ,
DILA YIDHAAHDAAYE.

IYAGUNA MARKAASAY KU DIDI,
DIIDI MAHAYAANE.

BALSE IN MEESHA LAGU DOORSAN YAHAY,
WAXAW DALIILKIIYA.

DUQAYDII BADNAYD EE KU LUMAY,
DUUDSI IYO JEEDAL

DEMANAANSHAHAA REER TOLKAY,
LOOGU DAW GALAYE.

SIDII BAY U DABA ROORAYAAN,
DAALINKII ROGAYE.

DOOX IYO HADDAY NALA DEGAAN,
DEGELKA BUUHOODLE.

WAXAAS LAGU DURDURIN EEBBAHAY,
UMA DARAADEENE.

SIDII DUMAR DAGAAL IYO AFXUMO,
UMA BXRXXXXXN DUL QAATEENE.

DIYAAR UMA HADLAAN WIILASHII,
DAWLADDA AHAAYE.

DAAROODKA AY WADA DHASHEEN,
DIR IYO HAYBTIISA.

HADDAY DERIS WADAAGAAN NIN KALE ,
DACAL MA LAAYEENE.

ALLA MAY ISKAGA SOO DURKAAN,
DERIS MA WAAYEENE.

DEYMADII ILLAAH MAXAMED DAGE,
NOOGA DEREJEEYE.

KUWA WELI KU DABAN DEEBAYAAN,
DUXI KA RAACAYNNE.

UDIGEY OO UDIGEY DUULKA WAA,
LOO DAN LEEYAHAYE.

HADDAAN ANIGU DAAR DHEER KA KORAY,
OO DAF IDHI SAAXIL.

IYABA DOORTE DAAYEER DAD CUNI ,
INU DULEEYAAYE.

DABADA HAYSKA RAACSHEE BAL MAAN,
DEYSTO HADALKAYGA.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN YAR WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE
XASAN OO U TIRIYEY CALI BHUUX AADAN WUXUUNA YIDHI;

HADDAAD CARARTO OO CARARTO ,
CIRKA HADDAAD U DUUSHANA,
ASTAADKOO KU CAYNSHIYO,
WALLEE CAAFIMAAD UMA FADHIDIB,
OO CADAN IN WEYN DHAAFTO.
SHARCIGU WAA KU SOO CELINNE.
ANOO KU CAFA MOOYAANE.
CALIYOW BUUHOODLE.

INTAASU KU DHAN YAHAY SIDA AANU
MAQALAY.

MAANSADAN YAR AYUU MARKAA CALI BHUUX UGU
JAWAABEY SAYID MAXAMED MARKII TIXDAA YARI
SOO GAADHEY BABADEEDNA WUXUU YIDHI;

RAGGA TEERIGII LALAMA DHACO,
TIIRAANYO KUMA SEEXDO IYO ,
TUNKA IGA WALLAAN LAYGU DHEGIN,
HADALKII LA TUUGEYSAN JIREY,
TUURAHA BANAAN IYO ANOW ,
NINA IMA TAXAARGO ANAA,
TOOGASHANA DAAYE.
TAHARO CEEDHIINE
TIINI DABADEED DHE.
WAA KA TOGANNAA DHE.
TALIYA CEELKII DHE.
TAY KU MEEL MARADHE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN

WUXUUNA U TIRIYEY KAARSHE GUULEED (KAARSHE SALIIQ

WUXUUNA YIDHI;

KAARSHOW CAMAADAAD TIHIYO, CAAMO BOORA LEHE.

CALINIMADU WAATAAD U TIDHI, CODAN AHAANAYNE.

CABAAB LAGU RIDYOW SIDA DAMEER, WAADIGII CIYAYE.

WAATAAD CARRAADEE LAHAYD, CAR IYO WAY WAYE.

CARABKAAGA WAATAAD KA TIDHI, CUURAR BAAN JARAYE.

CEEBAALAYOHOW WAADIGII, CAYDA SOO DIRAYE.

ANIGUNA CAGTII BAAN KU IDHI, CAALEYOHOW JOOGE.

CASHA FUUSHAYAA IYO BAD IYO, CADAN U DHOOFTAABA.

INAAN LAGU CAFIYIN BAY HADDEER, KU CALIMAAYEENE.

HADDII SHALAYTO CIIRIYO HABAAS, CULUS LAGUU KEENAY.

CIDIHIINA OO IDIL HADDAAN, XXB CAYMO LAGU REEBIN.

OO ADIGA CARARKII DORAAD, LAGUGU CAATEEYEY.

CASHIIR WAXAD AHAYDEEN, HADDII CIDHIFKA LOO QAADAY.

OO CAARA DHUUBYADA WARMAHA, LAGUGU COOMEEYEY.

OO CURADADIINII WARAHA, LAGA CAYAARSIIYEY.

CABAADKII KA BAXAY CALI BARAAN, LA CAJEBAAYAAYE.

MARKII CIISKA WEYN LALA DHACUU, CAAGAYEY YIDHIYE.

CIMRIGAY WAXAAN GOCANAYAA, CODASHADIISIIYE.

CABDULLAAHIYAAL IYO WARSAMAAN, IDIN CARAADEENE.

WAXAA SHIRE WARMAHA LOOGU CUDHAY, CADHO DARAADEEDE.

SIDII CAWL BAKHTIYEY WAYAGII, CAANKA BUUXSADAYE.

CAQLI HADDII AD LEEDAHAY, WAXBAA LA CITIBAARSHAAYE.

CINDIGAA WAX LAGA FIIRIYAA, CAYNKA AY NOQONE.

CUDHA LAGUMA SOO DHEGO, WAXAAN KUU CUNTAMA-HAYNE.

NIMANKAAN CABIIDSHAA AHAA, GAALKA COOFKA LEHE.

ADIGUNA ASKARI BAAD AHAYD, CAADA QAATE AHE.

HADDII AANAD NA CAALIQIN ANAGU, KUMA CISAAREENE.

CITIBAARTA ADIGAA FALIYO, CAMALKA SHAYDDAANE.

CAAWANA MAXAAD ODHAN LAHAYD, COONKA KUU NIMIYE.

MISE WAAD CALAACALI GUNBAY,E CAADADEED TAHAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN

WU XUUNA YIDHI;

XIRSIGII CANDHADA DHEER LAHAA E
EE CUURARKEENII QIRTEE,
CIDLA ANIGA OO SHALAY KA HELAY,
CAQLILAAWAYOHOW KAA TOLIMO,
CAADHKIYO XINIINYAHA MAGLIGA,
HILIBKIISA WAA CUNI LAHAA,
MAANTAAN CADDAADIYO ANOO ,
CAWSKII NUGAALEED KA BADAN,
MA COL BAAD AHAYDEEN RAGGUU,
NIMAN CIILBA QABIN BUU IDILEY,
CASHA KELIYA AAD MAQAN TAHAA,
CADOWGEY HA JABO EE KOBTII,

CAAQA INANKIISA.
CIISKA WEYN GELIYEY.
MA ANAN CAYNSHEENE.
KUMA CISEEYEENE.
KALAMA CEESEENE.
CAADA QAATAHA'E.
CANUGA OO WIILA.
CAALINKUU DILAYE.
CIIRADA U LAAYEY.
CALAF U DOONKIISE.
CADAD KU DHAAFAANE.
CALIYOW MAAN JOOGO.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY MAXAMED IBRAAHIM (AF DURDUR,

WUXUUNA YIDHI;

LAQAF LAQAF USOCOTOY HADDAY, DERISKA KAA LAYSO.
LEELEESHO ADHIGII HADDII, LIXIBA DUUL RAACDO.
SIDII CIIDAN LAAYACA HADDAY, LAABANTAHAY MEEL XUN.
HADDII AQALKU LEEXADA DHIGOO, LOOLKU KALA JEESTO.
AASAY SEYGA LEYL IYO DHARAAR, LOOXID KU AHAATO.
LAFEMEEDA DHAADHEER HADDUU LAABO, WAA GALABA.
HADDAY HAANTA LEEFTOO MARNABA, LEEBI GARAN WEYDO.
LEBENKEY KU SOO SHUBI HADDUU, LIQI OQOON WAAYO.
HADDII AANAY LAABTABA KU HAYN, LAXAMKA SOO SUUBI.
NAAGNIMO LIDEED KUMA JIRTEE, LAALUFTO OGAADA.
HADDII WIIL LABAATAN U JIROO, LALI AHAAN WAAYO.
LOOYAANTA DIRIREED HADDUU , LAAGGI CELINWAAYO.
MUSLIM LEYL USOO GALAY HADDUU, LUUN KA ROGI WAAYO.
LIIBAANTA XOOLAHA HADDUU, LEXEJECLEYN WAAYO.
OO AY LABAATAN U DUGTAY, LABA U DHEERAATO.
RAGANIMO LUDDII KUMA JIRTEE, LIILYE BAL OGAADA.
NIN GUMOO AN LOOG BIXIN HADDUU, LABA XERAALEEYO.
LEECAAN HADDUU BADAN YAHOO, MARO LUGAA JOOJO.
UU SEDA LEG IYO BADHI CUNOO, LAASTO GELIN NOOLBA.
CAANAHA LADAAB IYO HADDUU , LEXEJECLUU DAASTO.
KOL UUN BAA LIBAAX KAGA SHUBTAA, LUUMYE KU OGAADA.
RAG NINKII LADNAADAA WUXUU, LABAN LEGDEEYAABA.
DOONYAHA WUXUU LUULKA IYO , LACAG KA BUUXSHAABA.
WUXUU KHAYLI LIINLIYO MARBUUB LUGAHA JOOJAABA.
OORYAHA MIDDAAN LALI AHAYN , WUXU KA LEEXDAABA.
LIIQLIIQATOY GABADH WUXUU, LAANTA MARIYAABA.
LIXDAN MAALINTUU JIRO XARAGO, LAASAYE OGAADA.

WELI WAA SOCDAA

WAA ISLA ISAGII

SENGE LAAS QABOW IYO XAREEDa
WUXUU DOOXO LAAXDIYO BANAAN,
ISAGOO LADNAAN JIREY HADDUU,
AMA LAACIBKII FUULI JIREY,
LIXDA HEENSIHIISA AH HADDUU,
HADDUU LOOXA BAWDADA KA LULOO,
RIISHKIYO HADDUU OOD KA LALO,
LABA QAADKA RAACDADA HADDUU,
GEENYOOYIN LOOLIYA WUXUU,
LIIFAA COL BUU KICINAYAA,

WUXU LADAABTAABA.
LABAN LEGDEEYAABA.
LAQANKU HEENSEEYO.
XADHIG KUSOO LAABO.
WADA LIFAAQSIIYO.
LUGAHA KK LAALAADSHO.
NIN IYO LAYNTIISA.
LALAL KA SOO BOODSHO.
DHALIS KU LAAYAABA.
LIBIN CUNYE OGAADA.

LALI DHEER LUGBAA IGAGA HADHAY,
LIX BILOODLE JIILAAL XBB ABAAR,
GOORTII LO'IYO ADHI GUDHEE,
KORAN LUDAN LIS IYO GAWRAC,
AWRKII LIBAASKA U EKAA,
TODOBAADKA HORE LAYDHI SOO,
DABADEED LUBBIGA NAAXI SOO ,
LIXLIX GAANANEY LABIYO TOBAN,
YAAQOOL CANDHADA AAN LULAYN,
LAYLIGA HABEEN FOOLATOY,
LAAFYAHA RIDOY LABAC DANBARA,
IS LEGDAY LUGAA BIIJIYAAY,
LIB RIDOY LAB IYO NIRIG MIDUUN,
DEGDEG LOO LISYEY QODAD LAFLIYO,
DABADEED SIDII LAAS AN GUDHIN ,
LAQAN HODA LICIIF HAAJIYAAY,
LEBEN DHIGA XAQ LABANLAAB GALAY,

LAAYEY GABAYGIIYE.
KAGA LABROONAADA.
GERI LAMAANAADO.
IYO LAYLI WADA YEESHA.
LAYLIGII QUMAYA.
LAQANYA WEYDOOBE;
LIIN ISU EKEEYA.
LAAL ISAGA MEERA.
KURUSKA LIILIIJA.
LAABTA KALA GUURA.
LOW KU QARIN WAAYA.
OOHIN LIBIQ SIIYA.
LAGU LAMAANEEYA.
LAQANYO MAAXMAAXA.
DAD U LADAABSIIYA.
WAA LAFE OGAADA.
WAA LAFE OGAADA.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CARAALE YAACI

WUXUUNA YIDHI;

xxx WAA JIIFTO.

RAGOW ANIGU GABAY DAAYEY,
NIN DOOR IYO DUQYAAL BAALE,
DADOO IDIL RAG IYO DUMAR ,
DURI HORE DEGAA FAARAX,
DADKUNA HAATAN REER MAXAMED,
HADDAY YAREHE DUGUGUURTO,
DAAROODKA MADAXDII DURIYADII,
AMA DEGAHA REER KOOGE,
DADKA DOORI DAWLADO,
DOXOR IYO DAWACA CAAYA,
HALKA GEEDI DOOXAAYO,
MA KU DEGEY DAYAAHOODLE,
MID KALAAN KU DARAYAA,
HALLA DOODO HALLA DEEQO,
NINKA FAARAX DABA GALAY,
DUGSI WEYNE GEELIIS,
LO'DA DABADA WEYNLENA,
ADHI LABA KUN DACAL DHEER,
FADHI DUULLAN DUULKOOD,
AMA DALANKA GIDIRKA AH,
AMA GEELA SIDIG DOON,
AMA DURAHA JIILAAL ,
AMA RAG IDIN DUUG DHAAMA,
ISDADABADA HADALKAAGU,
LAX DUQIYO WAN DAAR LEEG,
DIRAACDII BARIIS DACARA,
RI DUMAACA DABA OODAN,
HADDAYDAAN SHAN AWR DABAN,
ILMO AANAD DARUUR MOODIN,
WAR DALAY INA XAAJI QOF ,
AWEL HORE HADDAY DAYATAY,

ISNA DAALIN MAAYO'E.
DOQON BAASE TAABTAYE.
MARKAN WAA U DAAWO'E.
DERIS BUU URAACAYE.
DEGMADIISA WEEYEE.
ANIGAA DALEEYA'E.
SULDAAN CALI.
CABDILLAHAKAN DOORKA AH.
IYAGAY SU DUULA'E.
ANIGOW DAMIIN EHE.
AN DABOOLAY HAATANE.
DUBUHUU U LOOSHADAY.
DABA SHAALO WEEYEE.
DIL HALOO DHAQAAQO'E.
MID DAYEYSAN WEEYEE.
SHAN DUKAANNA DHAAMEE.
DADKALAA SHAFEECDA'E.
DUMARKAA ADEEGA'E.
DERIS LAMA WADAAGO'E.
SUBAGGAA DAWAA-IYA.
DOOBIGAA XAYAABEE.
xxxxxxxx DARIBTIYO KARUURKII.
GOBI WAA DABEECADE.
DHADHAN DOORSAN WEEYEE.
DIDUGAD DHAAFSAN MAAYEE.
DAB KU OOGI xxxxxxx MAYSEE.
DUGSI MOODI MEYSEE.
HEERYO DUUBANMAYSEE.
DUSHA SAARIMAYSEE.
DAYEYSAN MAAHEE.
DIB USOO RUJUUCDAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN JIIFTADA AH WAXAA TIRIYEY GEEDI YAYARE

WUXUUNA YIDHI;

GARAABIILADAAD SHEEGTAY,
NIN LA DIIDEY HADALKII ,
MAXAAD HAATAN KAGA DAALI,
MEHERKIINA LAGU DUUB ,
GU'GA HAATAN LAGU DAAHAY,
DAHABKIYO SHAWAADIIRTA,
WAXA SUUQA DANANAAYA,
GEELAA DUSKA U JOOGA,
IN SIBRAARKA DUHUR NOOL,
HADDAY SIDATAN WAX U DAYDO,
HADDAY SITAN WAX DAYDO,
WAJIINUHU HADDUU DAATO,
NIMCADAA HADDAY DAYATAY,
INA XAAJI NAGU DIIDEY ,
DAYR NOOLBA SOCODKIINI ,
DEYN HAD GOOR JOOGA,
HADDAANAAN DURDURI GEYN,

WAA NIMAN DUKAAN LEHE.
DAWO YEELAN MAAYO'E.
INANTII UDEYNAYE.
DAYRTA AWELKEEDIYE.
DAAQAD UMA HAYSIDE.
ISKA DAADIN MAYSO'E.
DHEGIHII DILAACEE.
ALLA HAYSKA DAAYEE.
GARBIHII RAG DIIRMEEN.
DAARTIYO DUKAAMADA.
DOONIDIYO BEDENKII.
DOOXADIYO IDIHII.
NINA DOOXI MAAYEE.
DAR XUMOOYINKIINIYE.
DOCA JOOGSIGIINII.
DAAQAD UMA HAYSO'E.
MA NALOO DUDAAYAA.

WAA DHAN YAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY DHAWRE

OO AANAN INAANYIHIISA HAYN WUXUUNA YIDHI;

ISMAACIIL ADAAN DAAYINKAA,
HADDII WAAGU DAALACO ADAA,
DABUUBTAAN KUSII FARO U GEY,
DUCO WAALID BAAD QABI JIRTEE,
DARAAWIISHTA QAYBSII,
HADDUU DOORA WEYNOW KUFRIGU ,
UU DAARTA EYL YAMI HADDAAN ,
ALAYLEHE AFKAAN SII DIRSADAY,
JIGRE DANAB LA MOODIYO RASAAS,
IYO WIILAL WADA DUUB CADOO,
OO GAALKA WAA DOOXAYAANE,
DEREJAALE AABAHAY HADDUU,
DAAR NIMAN LAHAYN BAY DIGNIIN ,
DOONYADA INTAAN GALAY MIYAAN,

DIINTA LAAYICINE.
DAWGA SII MARIYE.
DAAHIRKII WELIGA.
DELI DHAC HAW YEELIN.
INTAAD DAACAD UGU SHEEGTO.
DUULAN SOO BIXIYO.
HAAD KU DULU FAAQIN.
WAA B DALEEL MADHANE.
DIRIRIGLAYNAYSA.
DIINTA NEBI RAACAY.
DURI KA REEBEYNIN.
DAAWAD IGU JAADAY.
DANI KA HAYSAAYE.
LIBIN KU DAAN SHOODAY.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN

OO UGU JAWAABAYEY DHAWRE MARKII MAANSADIISII GAADHEY

DABADEEDNA WUXU YIDHI;

DHAWROW DABUUBTAAD NA TIDHI, DUCA QAB NOO KEENYE.

DARWIISHKIINA SHEEGYOO MA QARIN, DACAWADAADIIYE.

HADALKII U KAASOO DIRABAY, DIIRKA KA CADDEEYE.

DADKUNA MAQAL DEBNAA INAD KA TIDHI, GAAL CADBAAN DILAYE.

ANA WAAN KU DIIRSADAY ILLAAH, DEREJO SIIYOWE.

MAANDHOW DADAAL YAANAD NOQON, DAADUF BEEN BADANE.

HADDUU DOORA WEYNAHA KUFRIGU , DUULA SOO BIXIYO.

UU SOO DAREERSADO WIXII , DIR IYO DAAROODA.

MAANDHOW DAN HAW GELIN FULAA, SII DABAYSHADA'E.

DOGOBTA IYO XAABADANA DUQUSKA, NOUDHAANSO.

DURDURKANA HA XAANAYSANINE, DARARSO GEELAAGA.

DUUNYADANA DEYR ADAG U DHIGO, YAANAY KAA DIDINE.

DABKANA HAYSKA LUMIN YAAN IBLEYS, DAWYO KAA RIDINE.

ADIGANA DAAR BAAN KUU DHISAYE, DIBADDA HAW BOODIN.

DAARTANA HA BIXIN DAAYINKAA, DUNI INTAAD JOOGTO.

MAANDHOW NINKII DAWLADAA, KUU DAGAALAMA'E.

KUWA DUMIYEY ILIG WAA WAXAAN, DAAHIR LOO DHALINE.

MAANDHOW DAAWAD YUU INAGA GELIN, CADOW K KU SOO DUULEY.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY RAAGE UGAAS
ISAGOO KU KALA CELINAYEY QOLOOYIN DAGAAL
U DIYAAR GAROOBEY. DABADEEDNA WUXUU YIDHI.

KUWII ARKA KEENADA GESHEE,
EE WAAGA KALAXDIISA RARAY,
KOL DHOWEYD RAGAAD WADA OGEYD,
SOO KACA KURSIGA AAKHIRAA,
KALA MALE MALOO JARAY RAGGAAN,
KAXDA BEDER SIDII KUUS QOTAAD,
KORMI INA SHAN FUUL BUU AHAA,
KABLALAXANA AW MAXAMED XXXXX SELEL,
HADDII KELIDI LABIHII LA DILEY,
KANCAAN IYO FIRCOON IYO ISAGU,
DAA-UUD KITAABKUU AKHRIYEY,
KABTIGUU ISMAACIIL KU WADEY,
XIRSI MUUDE KAYN LAGUMA RIDIN,
XASAN KOOSHIN XAAJADA KANFOW ,
KAFTAN BADANIHII GAWS MARIDE,
WAX LA KOOBIYABA NUUR SIYAAD,
KOB UUN BUU DHAFOORADA HAYAA,
KEBDA GO'AN ARDAAGIYO MINKUU,
KIBIR IYO USANA WAA WIXII,
ANNA MAAN KA KAADSADO TOLKAY,

FARASKA KOOREEYEY.
KUD IYO KAAR LAAGA.
KAAMIL NIMADIISA.
KAALAY LA LAHAAYE.
KAYDIYAAYDA HAYEY;
MA U KARUURAADEY.
KAAHINKII DHIMAYE.
WOW KABAAL JABAYE.
KADAN OGAADEENE.
HAYS KILKILIYEENE.
KAAFIR BOW DHIGAYE.
KAWSHAD BAW BAXAYE.
KABARNA WAA MAADHE.
KORAMADII MUUSE.
KALALAXDII MAADDA.
KURUSLA MEESHIIYE.
KOOSHIN MAXAMUUDE.
AAMMIN KUUDUDAYE.
KADAY BAH GEEL XIISE.
WOW KULKULULAAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY RAAGE UGAAS ISAGOO
KU CALAACALAYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI.

GUJAAD IGU DESHEE AW CISMAAN,
GABAY HADDAAN SHEEGO.
GARTAY WEEYE OO WAA NACAYE,
GARAN MA WAAYEENE.
ADUUNBAA I GOOCGOOCIYAYE,
WAYSKA GAASIRAYE.
GARUUD BAAN RARAAYAA HADDANA ,
WAA GULAALAHAYE.
GALOW WUXU DHAWAAQAA MARKUU ,
GULUF DAREERAAYE.
GOOL WUXU BAROODAA MARKUU,
GO'ATIN JOOGAAYE.
WAXAY GORAYO OYDAA MARKII,
GOOBKA LA ARKAAYE.
WIYIL WUXU GARDAASAA MARKUU,
GOLE SAMAYSTAAYE.
GORSO WAXAY CABAADAA MARKAY ,
NABARO GAADHAANE.
ARBENA WUXU GARDAASAA KOLKUU,
GABANKA WAAYAAYE.
ANNA WAXAN GANDOODAA MARKAAN,
GEERIYESNAHAYE.
GUURAA IDILEY AAN HADDANA,
GAMA KU RAAGAAYE.
GURDANKAAN MAQLAAYAA HADDANA,
DHEGUHU WAA GOOFE.
GEEDKAAN ARKAAYAA RUGTAAN,
GARAB MARAAYAAYE.
GALBEED BAAN U JEEDAA HADDANA,
GOOHIBAAN TEGAYE.
GEEL BAAN DHAQAAYAA HADDANA,
GORAYO WEEYAANE.
GEENYAAN KU JOOGAA HADDANA,
GABAX MA ROOREYNE.
GOBO DHEER ANOO QAADAYAAN,
GUUL DARAYSNAHAYE.
GACANTAAN KA DABA GEYNAYAA,
GODAN BANAANAYNE.
GALIILYADA JIDHKAYGAA,
HALDHAA GANAN LA MOODAAYE.
GODOB BAA UUNKA LAGU SII WADAA,
GOOR IYO AYAANE.
GUULOW XAGGAA NAGA GARGAAR,
GEERI LOO DHALAYE.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY RAAGE UGAAS MAR UU QAALIN CURATAY OO MARKAA DHASHAY CAANO KA WAAYEY, DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

ABYAN OO ABEEROWDEY OO,
OO UU AGOOLKII KA BAXAY,
OO IKRAANLE SOO MIRATAYOO,
AAN OOMANAYNOO HARRAAD,
OO UBADKI REERKA U YARAA,
MAXAAN DHIILKA UGA UUMIYAA,
UUREY HAWEENIYO UMULI,
UBAD AABOHOOD LAGA DILOO,
OO GAAJO EEDAADAYAA,
CULIMADA WARMAA LAGA ASLAAN,
EE AAYADDII NEBI KU GO'I,
MIDGAANKAA UGAADHSIGA TEGEE,
EE BAALKA DHEER ILA AG MARAY,

UGUB KU WEYNAATEY.
UDUB KA DHEERAADAY.
EERI SOO GURATAY.
UURKU GUBANAYNIN.
II AFURIN WEYDEY.
WAA ADDUUN GUDHAYE.
ARAGTAYAA MOOYI.
WADA AGOOMOOBEY.
ARAGYAYAA MOOYI.
LAGA AJOONEYNIN,
ARAGTAYAA MOOYI.
AYDA KU HUNGOOBEY.
ARAGYAYAA MOOYI.

WAA DHANYAHAY

WAXAA LA YIDHI MARKII UU GABAYGII AFKIISA KA DHAMAADAY AYUU MIDGAANKAA UU GABAYGA KU SHEEGAY NABAR UU U DHINTAY KU DHUFTAY. DABADEEDNA HASHII BAA CAANO BADAN YEELATAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY RAAGE UGAAS

WUXUUNA YIDHI;

GULUF LOO BALAMAY BOOD HILAAC,
INTAAN HEENSE BILIC WEYN LA KACAY,
SARTA BIDIX BILAAWAHA AFKA LE,
BALAAXOODKA CAANAHA SIBRAAR,
BAASHAALKA WAA NECEBNEHEE,
TAXAABAHA BAXSANE MAALINTAA,
ODAYAAL HABEENKII BERDEDEY ,
BASARKAAN U GEERAARI JIREY,
BARQINKII XAKAME LOOGA BIXI,
INTAY XAAJO NIMAN BAANAYEEN,
BAHDEE MUDAN BAHDEE XEER LA BIDAY,
WAA BOQOR SIDIISIYE GADAAL IIGA,
INTAY UBAXA IGU BOOBAYEEN,
BISINKA IYO YAASIINKA IYO ,
DABADEEDNA BAARUUDKAYOW,
BIDHAAN ARAGNAY BAYR IYO,
BILA WEERARKEEDII LA MOOD,
BASLE ORODKA BAASAAR ILMAHA,
MID BALAADHAN OO GEELA JIREY,
INTAAN BAW KU IDHI TEERBGII,
BERI DHIIGLE HAYLAHA BADH GO'AN,
ODAY LEEXU BAWDADA BUDLIYO,
KURAYGII BAXSADAY QAYLADII,
BURMAD KEENE DHOOR WIILASHII,
KUMAN YAALO BOQOL KUMAN KALOO,
BURUUD NIMAN LAHAYN BAA BXXXX BA'AYE,
BAACBAACINTII HORE MID KALE,
MAXAMUUDI LABA GOOR BADIYO,
BULIGAAN HALKAA KALA GEDIYEY,
RAADKEY DABAYLUHU MAREEN,
BI'I TU'INAY OO MEEL BANAAN,
DURBA BURUNJIDEEDII CUNOO,

BOOSAHOW RARANAY.
BAYDARKA U BIIJEY.
BAALIYADA QAATAY.
BAAL LE KAGA MAALAY.
BIXITINOO DUULLEY.
BUUFIS ULA JOOGNEY.
BELEL U NOOLAYNAY.
BUUNISADA YEEDHSHEY.
BAADKA IYO KAYNTA.
BURARKA GOOGOOSEY.
TALO LA BAAL HAADI.
KALA BAYDHE.
BEERKA KA CAWEYNEY.
EEBBEHEEN BARINAY.
TEEYO WEYN BIXINAY.
DHULKAY BOGI KA FOOFAYSEY.
SIDA BANAADIIKHDA.
BIDIX KA DAYMOOTAY.
IIGA KALA BAYDHE.
BEERKA KAGA TOOGTEY.
KII BAQAY U GEEYEY.
BIIDHISADA SIINAY.
BEESHA WADA DOOJI.
BULAY KA MAALAAYEY.
FAARAX LAGA BEERAY.
HEEGANKOW BIXINAY.
BAYDDA KALA GOOYEY.
DHIIG KA SOO BIXINAY.
BOODHKA KALA LAABNAY.
BUDIMO WEYN JEEXNAY.
BAATIR KAGA LOOGNEY.
GAAJADII BI'INAY.

WELI WAA SOCDAA

WAA ISLA ISAGII

BAH HALAAKA LAGA SIIYO IYO,
BOOBKA KAGA DHAARTAY.

BASAR XUMADA LAYGUMA DAYEE,
BAARAX UGU QAYBSHEY.

BADEL IYO BULXIYO GEYDHO IYO,
BEDEN LAMAANKEEDA.

BURCIYO SEENYO QAALMAHA BULKUDA,
DEER CAS BOQON WEYNLEZ.

BIDDE HAAMO LAGU DHAAMIYIYO,
BACADLIHII NAAXAY.

IYO LABA LA'IISOO BAXSHOO,
BURIYO DHEERAADA.

IYO LABA MURKAHA BUUXISAAN,
BUUBIS KAGA TAABAY.

IYO LABA SEDKOODII BADHTAMAY,
FOOLA DIB U BEEGSAN.

BAABKUU YIQIIN AABAHAY,
BAAL ISUGU SOOCDAY.

BOQOR IYO BIYAHA FAARAX IYO,
BAADIL NIMO SHEEGTAY.

BUKULLUU NINKII II CESHANA ,
BIIXIYAA JEBIYEY.

DHALIINYARADU WAA BADANTOHOO,
WOW BUN DUBAYAAYE.

BEEN SHEEGI MAAYO'E KUWAAN,
BAABA'SHAA M LUMAYE.

BASRA IYO WARKAYGII KA GUDUB,
BELEDKA XAAFUUNE.

BAAL GORAY LA MOODYOW BERYAHAN,
MELEG HA KAA BAYDHO.

WAA DHANYAHAY

WAA SHEEKO GAABAN IYO GABAYO GAAGAABAN OO
KU SAABSAN, RAAGE UGAAS IYO NIN LA ODHAN JIREY
SHULUC.

GABADH RAAGE UGAAS U DOONANAYD ILMA ABTINA AY AHAAYEEN, AYAA WAXAA GUURSADEY SHULUC.
ISAGOO SHULUC MAQANYAHAY AYUU RAAGE UGAAS U YIMI GABADHII OO GURIGII KELIGEED
JOOGTA. MARKII UU TOOSIYEY OO AY GARATAY INUU RAAGE YAHAY, AYEY FARASKII ALAABTII UGA DHIGTEY,
OO WAXAY G FIDISAY GOGOL. RAAGE IYO CIDDA GABADHU KA DHALATAYNA WAXAA DHEX TAAL GODOB OO
HADDII LA ARKO RAAGE LA BIXIN MAAYO.

MARKII WAAGII CADDAADAY AYEY GABADHII AABEHEED U TAGTAY, OO WAXAY KU TIDHI;
AABE HADDAAD SAAKA RAAGE UGAAS ARAGTO SIDEE U GELI LAHAYD ? MARKAASUU ODAYGII YIDHI;
AYAANKAAN SAAKA KU ARKAYO RAAGE UGAAS MALIHI. MARKAASAY GABADHII TIDHI WAXAAD SAMAYN LAHAYDBA
RAAGE GURIGUU JOOGAA. MARKAASUU RAG USOO DIRAY DHALIINYARO AH OO WUXUU YIDHI; HALA DILO.

MARKII RAGGII AQALKA HORTIISA YIMAADEEN AYEY GABADHII INTAY MARADII ISKA FURTAY
OO IS QAAWISEY AYEY AQALKA IRIDKIISII ISTAAGTEY.

MARKII LA ARKAY GABADHII OO QAAWAN OO IRIDDA TAAGAN, AYAA NIMAN GABADHA AY WALAALO
AHAYEEN DHAARTEEN INAAN LOO DHAAFIN LANA DILIN. MARKAASA LAGA NOQDAY OO ODAYGII LOO SHEEGAY
ARRINTII. MARKAASUU ODAYGIINA YIDHI LA DILIMAAYO . MARKAASAA ODAYGII RAAGE UYIMI OO LAYSA
SALAAMAY, DABADEEDNA MARKII LAYS WARAYSTAY, AYUU ODAYGII RAAGE KU YIDHI RAGOW MAR HADDII
AY MAQAADIIRI DHACDAY OO GABADHII KUU DOONANAYD LA GUURSADEY, WAXAAN KUU DHISAYAA GABADHA
WALAASHEED OO KA YAR. ADIGUNA SIDAA KU SAMIR OO RAALI KU AHAW. MARKAA RAAGE WAA OGOLAADAY
ISAGOO AANAY LILAAHI KA AHAYN. MARKII RAAGE GABADHII YARAYD LOO DHISAY RAAGE GABADHII MA
NAAGAYSAN. GABADHIINA WAA XISHOOTAY OO RAAGE MA AY SHEEGIN EE WAA ISKA AAMUSTAY. HADDABA
MAALIN MAALMAHA KA MID AHAYD AYAA NINKII XXX GABADHA WEYN QABEY RAAGE U YEEDHAY OO WUXUU KU
YIDHI KAALAY AAN SHAXNEE.

MARKAASAA GEED GURIGA KU DHOW GOGOL LOO GEEYEY OO AY KU WADA SHEXEEN. SHULUC GABDHII UU
QABEY EE RAAGE KA QAADAY AYUU LA SOO BALAMA OO WUXUU YIDHI; HADHOW INTAAD DHAR WANAAGSAN SOO
HUWATO OO NOOTIMAADDO WAXAAD NA WEYDIISAA FARDIHII OO MARKAA ISKA KAAYA DHAAF. MARKII IN DOORA LA
WADA SHAXAYEY AYEY GABADHII OO DHAR WANAAGSAN SIDATAA INTAY SOO AG MARTAY MARKAY MEEL RAAGE
GARABKIISA AH MARAYSEY , INTAY TIDHI FARDIHII MAARAGTEEN AYEY ISKA DHAAFTAY. MARKAASUU RAAGE SI CAADIYA
U FIIRSHEY GABADHII. MARKAASUU SHULUC GABAY KU BILAABEY RAAGE OO XXX WUXUU TIRIYEY MAANSADAN
GAABAN EE SOO SOCOTA DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

(TUNBUL NIMANA OO MEEL FADHIDA , RAG ISU TOOKHAAYA.
TOL KAFTAMAY MIDBAA LAGU TUNSIIN , HADALKI TAAGNAAYE.
TIIRAANYO NIMAY HAYSO IYO, FARAXU KUU TAABTAY.
NINBA TAAWADIISUU HADLAA AMA , TILMAAMAAYE.
TANAAN DEGEY TANAANAAN DEGAHAYAA, TANINA II LAABAN.
TA KALEETO AAN DEGAHAYANA, WAA TUSMO AN DOORAN.

WAA DHANYAHAY.

[illegible]

MARKAASAA WAXA U JAWAABEY RAAGE OO WUXUU TIRIYEY MAANSADAN GAABAN EE HOOS KU [illegible] QORAN DABADEEDNA WUXU YIDHI;

(SHIL MA WEYDO MEESHII ISBLEYS , OOG KA SHIDAYAAYE.
WAA SHUQULADIISII KHALQIGA, [illegible] INU SHIDEEYAAYE.
SHARAF IYO WANAAG MALE NINKAY , SHIR ISLA QAATAANE.
KOL HADDII AY SHAWR WADA DHIGTAAN, LAYSLA SHUHUBOWYE.
SHULUCOW SHAR BAA INA DHEX YAAL, MADAXYO SHAYDAANE.
SHAXDA DHIGITINKEEDAAN KA GARAN, INAN SHISHEEYOWNEY.

WAA DHANYAHAY.

WAXAA GABAYGII KU NOQDAY SHULUC DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

(JIGTA KABAHA IYO LAAFYAHAY, JAGAC KA SIINAYSO.
DHEXDA JILICSAN IYO QOORTA IYO, SUUNIYAHA JIIDAN.
KHAYLIDA JILBAHA LOO DHIGIYO, JAAHA WILICDIISA.
JAWAABTAY KU SIINAYSO IYO, JIMICA SAWDKEEDA.
JAADJAADKA AY SIDATO IYO , QURUXDA LOO JOOJEY.
HA JALEECIN WIIL BOWGA DHACAY, JALANQA HAADEEDE.

WAA DHANYAHAY

IMINKANA WAA RAAGE UGAAS OO JAWAABTII CELINAYA DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

(GEENYADA NIN LIHI QOOFASHEE, QARINTA MAAXAYSA.
EE QURUXDA BADAN AAN FARDUHU, QIIMO LA EKAYNIN.
EE QALABKA SAARANI DHANYAHAY, QOORTA IYO DUUDKA.
EE LOO QUSHUUCEE KHALQIGA , LAGALA QOOFAAYO.
EE QAALI LAGU DOONAYAAN, LA ISU QUUDHAYNIN.
QIYAASLI-I NINKII UGU DHACOW, QOOMAMAA XIGIYE.

WAA DHANYAHAY

SHULUC BAA JAWAABEY WUXUUNA YIDHI;

NIN DHAWR QAALIN AABIHII DHALOO, QOLANA KUU SHEEGTAY.
QALABKII DAGAALKANA SITAAN, QOOFIN WELIGIIBA.
OO LOO QIRAAN GEESINIMO, CIDI KU QOODAYNIN.
OO LAGA QADHQADHO DIRIR HADDII, LA ISKU QAAD QAADO.
MALA QOONSAN AADKABA HADDUU, GABADHA KAA QAADO.

WAA DHANYAHAY.

IMINKANA WAA RAAGE UGAAS OO JAWAAB KAMA DANBAYSA BIXINAYA WUXUUNA YIDHI;

NIN DHAWR QAALIN AABIHI DHALAAN, QOLANA KAA LIIDAN.
QARANA EEBEHEEN SIIYEYOO, QAATAY SALABKIISA.
AAN LOO QUMAYN DIRIR HADDII , LAYSKU QABAX SIIYO.
OO WELIBA QAALIBAN HADDII, QOOMAN LA ISMAAGO.
MALA QOONSAN AADKABA HADDUU, RUBADDA KAA QAADO.
WAA DHANYAHAY.

RAAGE MARKII GABAYGAA KELMADDII UGU DANBEYSEY AFKIISA KASOO BAXDAY AYUU AMLEY GALKA KA DHUFSADAY OO ISU WAREEJIYEY SHULUC. HALKAASAA SHULUC KU GEERYOODEY. RAAGE MARKII UU NINKII SHULUC LA ODHAN JIREY DILEY AYUU GABADHII OO AWR SOO CARAABINAYSA INTUU FARASKIISII QABSADAY AF DUUBAY OO FANKA KU QAATAY. DABADEEDNA TOLKII BUU KU DHEX GUURSADEY NAAGTII SHULUC.

RAGGA QAARBAA WAXAY YIDHAAHDEEN WUXUU AF DUUBAY WIIL GABDHAHA LA DHASHAY OO MARKUU GURYOHOODII LA TEGEY AYUU FARIIN U DIRAY AABIHII OO YIDHI HADDII AANAD GABADHII II KEENIN, WAAN DILAYAA INANKA ; MARKAASUU ODAYGII GABADHII U KEXEEYEY , TII KALENA DALAAQDEEDII UGA SOO QAADAY.

GABAYADAASI HALKAASAY KU DHANYIHIIN.

MAANSADA WAXAA TIRIYEY QAMAAN BULXAN MAR NAAG UU QABEY LA YIDHI WAA LAGA FASAQAAYAA HADDAANAD U IMAN INTA WADAAD AW CUMAR LA ODHANJIREY LOOSOO DIRAY, DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

AW CUMAR GEDOONTAYE HADDAAD, NAGA GUDDAAN CAAWA.
RABBI HAYDIN GEEYEE HADDAAD, GAMA'A MULEYNWEYDO.
AA GAANBISAAN SOCOTO WAY , GALAN GALCAWDAAYE.
GULUF IYO COG GUUTIYO COL WEYN, GALALAFTII WEERAR.
GANTAAL EEBO GOOS IYO RASAAS, KUGU GALAYDHYEYSA.
WADADA GOONYEHEEDAA DIL IYO, GAWRAC IYO JIIFIN.
GALOW IYO SHINBIRO GII LEH IYO, GUULDARIYO QOOFAL.
GULAAL DHAGAXA GEED MUDA LUGTIYO, GOCONDHO SOO JEEDDA.
WIYIL GAATIN GOOL IYO LIBAAX , GUCUMO AAR YEESHAY.
GOD ABEESO GOOD IYO MAS IYO, GUURATADA HOOSE.
GUNTI NEBI ALLA HAKAA GESHIYO, GOLAHA YAASIINE.
GAAM IYO HADDAAD NABAD TAGTAAN, GURARKA AW NUUXA.
GEYIGA AW WARFAA IYO BASACAD , AMASE GUULEEDBA.
ISMAACIILKA GAANKA AH HADDAAD WAR , U GAMUUNAYSO.
WADAADKII ISLAAMKUBA GARTEE , GACANTA SAARAAYEY.
GABAYGAAN KU FARO IIGA GEE, IGU GAR WEEYAANE.
HA GEFINE GOBTIYO XAAJADAA, ODAYO GAADHSIIYA.
NABSI LAMA GURTEE SEEDIYAAL, GUDA AMUURTAYDA.
GADAAFIYO COL LAMA SOO DUDEE, GUUD CADDAHA MIIRA.
DABADEED GEDEY IDIN LA TAHAY, SOO GADAAL CELIYA.
ANIGUNA WIXII ILA GUDBOON, GAAR AN UGA SHAWRO.
GAAL IYO GARUUR NIMAN NOQDAAN, HAYBI KALA GEYNIN.
NINBANA GOOSAN KII KALE KOBTUU, KAGA GOL ROONAADO.
EE GOBOLKI GODOB FOOL XUN IYO, GEERI KALA DHAWRAN.
EE GOBOLKI GOOJADA QOTAAD, GAWRAGA RUUGAAYO.
EE GOBOLKI GUBANKAA ISAAQ, GORAYO CAWLOOBEY.
EE GOBOLKI GOCORKII HARTIYO, GOROD LA BEELOOBEY.
EE GOBOLKI GAARDIGA HOBYOOD, CALI GARGAARAAYO.
EE GOBOLKI GAADHKIYO NAFTII, GELIYEY REER NAA-IB.
EE GOBOL GADHAA HOOSE IYO, GURIGA SII SEEXDO.
EE GOBOLKI REER AADAN GAWL, GACANTA SAARAAYO.
EE GOBOLKI GOOF IYO XUSEEN, GARAB KU TAAGLEEYEY.
EE GOBOLKI DHAWR WEBI GUDBEE, HABTI GARAN WAAYEY.
AAN GOBOL GUDOON IYO LAHAYN , HEBEL INOO GEEYA.
EE GOBOL SIDII GEENYADIYO, GABADHA LOO JEEDLAY.

WELI WAASOCDAA.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY QAMAAN BULXAN ISAGOO KU WAANINAYEY
REE CABDULE DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

CODKA GABAY COLAADOW NIN ,
CIRAYSTOO MA TIRIN MAANSADII,
CINDIGI KEENA CAAWAAN FURFURI,
CIMRIGEY INTAAN JIREY,
AAN CALASHEY DHEEF IYO WIXII,
CASHA NOOLBA SOW CADHO HOR LIYO ,
DUNIDA CIIRTAY QAARBAA KU HADHA,
CARUUR DHEREGTEY CAANIYO HADHUUDH,
CAMAAG DOQONA CAANIYO DHUL SOW ,
IYAGOO CAYILAY BAY ARKEEN,
WAA CAAMO NIMANKAAN OGEYN,
CIRIID KULUL CAGAAG IYO RASAAS,
CIWAL GABANA OO LOO XISHIYO,
KOLKAAD CAANO IYO WIIL TAHAA,
WAXBA CALAACAL KUMA YAAL HADDII,
ALLOW YAAN CIROOLIYO TASHIGA,
CIRKOON ROOB KA WEYNIYO ABAAR,
CAWSKIYO BIYUHU WEY ENGEGI,
CUUDKAA YARAAN OO DHULKAA,
CALALAAS AMXAARKIYO KUFRIGA,
INGIRIISKA CADAN SOO DEGIYO,
GIDHLI GAAN CALAQAN SOW TALYAANI,
MAKAAHIIL CIDDUU DABA SOCDAYE,
NIMAN CALANLE BOQOR CAADILIYO,

LAGU CAASIYAAN AHAYE.
CALANKU SAARAAYE.
CEESH LA II WADAYE.
AMAAN CAGAHA MEEL SAARAY.
CALAF LA II SIIYEY.
CUDURTI II MAAHA.
CAAWA SAY TAHAYE.
LAGA CIRAAB ROONE.
CANUG HALAYN MAAYO.
CIIDNA LAASIMAYE.
CEEG MARKAAN TEGAYE.
CARAR LA FAYNUUNO.
CAAFIMAAD MA LEHE.
LALA CABSOODAAYE.
CAYDH LAGAA DHIGO'E.
CULIMO DHAAFSIININ.
YAA CAMIMI FAAFE.
CEELKAN DOOGSADAYE.
SOO CDHIIDH NOQONE.
CARANAYEE FAANAY.
BADAHA COONKOODA.
SOO CAWARI MAAYO.
CADAY MA LOO DIIDEY.
CURAD MA SII LUUDAY.

WELI WAA SOCDAA

WAA ISLA ISAGII

CASHARKII LA DHIGAY SOW DORAAD, CADARKI BEEN MAAHA.
HABAR YOONIS SOW CALI AMMAAN, INA CIDOOD MAAHA.
SOW JAAMAC IGA CAAQIBEE, LAGUMA CEEBAYNIN.
GEELEER CAWAAGTA LIHI SOW, CAABUQ YIMI MAAHA.
CASAMAADKU NIMANKUU HELEE , CADHU WELI HAYSO.
CINDIGIINA KAMA FIIRININE, MA CAFIDEEN AADBA.
SOW CEELIS IYO REER ISAAQ, CAMALADDII MAAHA.
CABDALANA RAGAAD KA CUBTANTEEN, CIID MA LAGU TUURAY.
CIDOW DHIMO'E SOW INA XAKAAR, LAMA CADDAYN DAARTAN.
CUMAR NUURNA SOW TAAN HORTII, U CADILEYN MAAHA.
CARIGA EEBBEHEEN NABAD KOBAAN, UGU CARAABAYNO.
OOYNAAN CARUUSIYO AHAYN SIDATAN, CAADH GOYGA.
CAR YAA GARAN CADCEED IYO CADCEED, KOBAN CAGAA SAARO.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY QAMAAN BULXAN

WUXUUNA YIDHI

MAXAMUUD CIYOW TALA ADUUN XXXXXXXXX	MIRIRIG WEEYAANE.
WAA WAXAN MASUUBANA LA'AYN,	LAGUNA MAANSOONE.
HADBA ADIGA OO MOOG AYAA,	MAHAYIN CAARAAYE.
AY SOO MUDH ODHAN DUUL MADOW,	MILAYGA DAYREEDE.
MA MOODEYN MIDANAA KUUGU XIGI,	MAALINTII SIROWE.
WAXSAAD MARI HALKII EEBAHAY,	KUGU MANAYSTAAYE.
MUDDAAHANO MASALO LAAXINAA,	MADHISAY DAAROODE.
MUSLIM GUBE MUGDAA IMAN KOLKAY,	MADAXA QAADAANE.
RAGGAAN MIIDHAN MADAXDOO FAQDAA,	MALE KHASAARSHAAYE.
NAFTU WAXAY U MUXIBOON KOBTAAN,	LAGU MANAABAYNE.
WAANA LAYSKA MAANICI HALKAY,	MAHADI KUU TAALLE.
MAKAAHIIL MADOODIYO KA SAMIR,	MUDUDKI CAADOODE.
XXXXXXXX MADHEEDHKII KU YIIL DHIRINDHIR IYO,	XODAYO WAA MAWDE.
WAA MAYTI AAKHIRO WAR DHEER,	MAQADINKEEDIIYE.
MAGACOOD BA'YOW WAXAD TIHIIN,	DIBADDA MAYD YAALE.
MAHAQAWDE MAATADA HADDAAD ,	MIDIGTA JIIDAANE.
WAA MELEG WAXAAD UGU FURTEEN,	DHABAB MUDKIISIIYE.
SOO MIILA GAABSADA HADDAAD QABAN,	KARTAAN MEELA.
AMA MAALA CAANAHA BANKAY,	MURUG KU DHIIQDAAYE.

WAA DHANYAHAY.

CAAMIR OO BELED WEYNE FADHIYA AYAA QAMAAN FARIIN USOO DIRAY OO XXXXXXX U YEEDHAY WUXUUNA KU YIDHI WAXAA LAGU SIINAYAA BOQOL GEELA IYO LO' BADAN EE KAALAY, MARKAASAA QAMAAN DIIDEY INTUU KA BAQAY IN LA SHIR QOOLO OO LA DILO. MARKAASAA NIN CALI CABDI LA ODHAN JIREY FARIIN DANBE LOOGU SII DHIIBEY . MARKAASAA QAMAAN BULXAN GABAYGAN YAR EE HOOS KU QORAN SII FARAY CALI CABDI WUXUUBA YIDHI;

Qamaan

JAWAAB BAAN MAQLAYE CALI CABDOW,
JIIDUHU HADDUU IISANYAHAY,
JIRAB KAMA DHIGTEEN XARUNTA TAAL,
HADDUU AWRKU JEEGADA DHUFSADO,
RAGNA JAAHA SIINWAA KOBTUU,
JIFI WAXAN DHAMAYN BOW DISHEEN,
JUUQDAAD TIDHAAHDABA MIDUUN,
JOOGSIGA HOREETAA WARMAHA,
JIDKAAD IGA GUBEYSAAN INTAAD,

IMA JIKAARTEENE.
JIGA MA YEESHEENE.
JIINKA LABA BAARE.
JIIR MASOO MARO'E.
MAWD KU JIIJADO'E.
DHAQANE JEERKIIYE.
JAALKAYAA MADA'E.
LAYGA JEEL BIXINNE.
JABAD DAB SAARTAANE..

WAA DHANYAHAY